Xusuus Qorkii Gees
Geeridii Cigaal Kadib

Ceel aan kuu galay
Ciil kuma qabtide
Cawska dibadda ah
Ee carruuruhu
Kaa celceliyaan
Ciil ma ku qabtaa...

Aaskii Madaxweynihii Jamhuuriyadda Somaliland Marxuun Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal [1993 – 2002] ee bishii May 2002 waxa dalka booqasho ku yimi wufuud badan oo ka kala socota wadamo iyo hay'ado danaynaya dalkan Somaliland, kuwaasoo ujeeddadoodu ahayd barashada Madaxweynaha cusub ee beddelay Marxuum Cigaal oo uu noqday Mudane Daahir Rayaale Kaahin.

Waxaynu aragnay sidii loo doortay Mudane Daahir Rayaale Kaahin, markii la soo sheegay geeridii Maxamed Xaaji Ibrahim Cigaal **3-dii May 2002**, iyadoo la baal-maray dastuurka Somaliland qodobk11 **130aad, farqadiisa 4aad** oo tilmaamaysa muddada kala guurka ee weli xisbiyo lagu tartamin, taasoo uu nuxurkeedu ahaa in Guddoomiyaha Guurtidu uu sii hayo xilka Madaxweynimada muddo 45 casho ah oo lagu dooranayo beddelkii Madaxweynaha.

Haddaba galabtii loo dhaarshay Madaxweynenimada Mudane Daahir Rayaale Kaahin oo uu goob-joog ka ahaa Guddoomiyaha Golaha Guurtida Sheekh Ibraahim, dhaarta kadib waxa guriga Sheekh Ibraahim ugu tagey rag siyaasiyiin ah oo ay isku hayb yihiin, una sheegay inuu ku dhacay gaf-dastuuri ah, kaas oo ahayd inuu isagu [Guddoomiyaha Golaha Guurtidu] si ku-meel-gaadha qabto xilka Madaxweynaha.

Sheekh Ibraahim Sheekh Yuusuf nimankaas waxa uu ugu jawaabay; **'***Waar ninkii [Daahir Rayaale Kaahin] aan xalay dhaariyay xilka Madaxweynenimo saaka ku qabsan maayee i daaya, wax kasta ha ahaatee***.**'

Arrintaas sidaasay ku soo af-jarantay, cid dambena kama ay daba hadal, xataa jaraa'idka afka dheer lehi waxba kamay odhan, taas oo magac iyo maamuus u soo jiiday dalka Somaliland iyo dadkiisaba.

Ayaan-darrada dhacday maanta odayaaashii Guurtida, Golihii Wakiillada iyo xukuumaddii ayaa isku tuurtuuraya xeerarkii, ma laga waayay nin garta intaa Sheekh Ibraahim Sheekh Yuusuf gartay, taasina waxay ka hortagtay in la isku qabsado dastuurka oo midi-midi ku taag noqoto sida hadda socota, waxayna badbaadisay soo jiritaanka Somaliland, haddii kale waxa dhici lahaa in sidii dawladdii sal-ballaadh ee General Maxamed Faarax Caydiid ee uu Xamar kaga dhawaaqay sannadkii 1995-kii, kaas oo markii uu geeriyooday lagu dhici waayay in la saaro Madaxweyne-ku-xigeenkiisii oo ahaa waqtigaas ahaa Cabdiraxmaan Axmed Cali (Tuur), ayaa loo dhiibay inankiisii Xuseen Maxamed Faarax Caydiid oo Madaxweyne loo magacaabey.

Xil-qabashada Mudane Daahir Rayaale Kaahin Somaliland waxa uu u keenay, isla markaana caddaysay in Somaliland ka duwan yahay Soomaaliya.

Haseyeeshee, waxa jirtay in dastuurku uu leeyahay qodobo iska horimanaya oo qaar wali ku dhisan yihiin hab-beeleedkii, kaas oo ka mid yahay qodobka 130aad ee aynu ka soo hadalnay oo aad moodayso in loogu talogalay in Madaxweynuhu uu mar walba ka soo jeedo beesha Isaaq, sidaas ayaa shirkii Boorama heshiiskii lagu gaadhay, in kasta oo aannu qoraal ahayn, haddana wuu ku dhaqangelay.

Haddii aynu isla eegno qodobka 89aad ee Dastuurka Somaliland, waxa uu ka hadlayaa habka buuxinta jagada bannaanaatay oo farqadiisa 1aad odhanayso;

‘*Haddii mid ka mid ah xaaladaha ku sheeggan qodobka 86aad ku timaaddo Madaxweynaha saddexda sanno ee u horreeya shanta sanno ee xilka loo doortay, waxa Madaxweyne-ku-xigeenku noqonayaa Madaxweyne ku-meel-gaadh ah. Waxana Madaxweyne lagu soo dooranayaa muddo lix bilood gudahood ah*.’

Farqadiisa 2aad ee qodobka 89aad waxay odhanaysaa; ***‘Haddii Madaxweynaha xaalad ka mid ah xaaladaha ku sheeggan qodobka 86aad, kaas oo odhanaya, ‘Waxay jagada Madaxweynaha iyo Madaxweye-ku-xigeenku bannaanan kartaa haddii ay dhacdo xaalad ka mid ah xaaladaha hoos ku sheeggan:***

1. ***Xukun dembi ah oo xilka laga xayuubiyey***
2. ***Hawsha oo caafimaad-darro darteed uu gudan kari waayo.***
3. ***Geeri ku timaadda.***
4. ***Is-casilid Madaxweynaha ama Ku-xigeenku wuxuu qoraal xil-ka-tegis ah u gudbinayaa Guddoomiyaha Golaha Wakiillada iyo Guddoomiyaha Golaha Guurtida, waxayna labada Gole fadhi wadajir ah ku oggolaan amma ku diidi karaan aqlabiyad tirada guud ee labada Gole.***
5. ***Haddii ay Golayaashu diidaan codsiga xil-ka- tegidda ee ku sheegan faqrada afraad ee qodabkan waxa Madaxweynaha amma Madaxweyne-ku-xigeenku xaq u yeelanayaan inuu mar labaad keensado codsi dalab xil-ka-tegis ah muddo aan ka badnayn saddex bilood markii uu codsiga hore qortay; waxaanna waajib ku ah labada Gole in ay xil-ka-tegidda ka oggolaadaan. Haddiise ay ku timaaddo labada sanno ee u dambeeya waxa xilka Madaxweynenimo la wareegaya Madaxweyne-ku-xigeenka muddada labada sanno ee hadha***y.”

Waxa kale oo uu Dastuurka qodobkiisa 91aad sheegayaa awooddaha Madaxweyne-ku-xigeenka, farqadiisa 3aad qabashada xilka Madaxweynenimo markay jagadu bannaanaato, sababaha uu tilmaamayo qodobka 86aad.

Haddaba, iyada oo Madaxweyne-ku-xigeenku awooddiisa koowaad tahay sida qodobka 91aad uu si cad u tilmaamayo xilkiisa, haddana qodobka 130aad iyo qodobka 89aad waxay xakameeyeen xilkiisii, sababta oo ah waxa ka dhadhammaysa inaan loogu talogelin marnaba inuu Madaxweyne ka noqdo dalkan nin aan beesha Isaaq ahayn, balse waxa qudha ee loo oggol yahay dhammeystirka labada sanno ee dambe Madaxweynenimada haddii jagadu bannaanaato, taas oo salka ku haya axdi-qarameedkii beelaha Somaliland 1993-kii Boorama ee ay xilalka qaranka ku kala qaybsadeen, iyada oo Madaxweynuhu ka soo jeedo beelaha Isaaq, Madaxweyne-ku-xigeenkuna beelaha kale. Sidaas darteed, ayaa loo xakameeyay awoodda Madaxweyne-ku-xigeenka oo looga leexiyey inuu toos ula wareegi karo Madaxweynenimada.

Markii uu Mudane Daahir Rayaale Kaahin xilka Madaxweynenimo qabtay, waxa yaraatay mucaaradadii ku taagnayd xukuumadda, waxaanna oggalaaday sagaal urur inay isu-diiwaangeliyaan doorashada dalka ka dhacaysa oo markii ku diidanaayeen Marxuum Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal uu noolaa.

Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin xukuumaddii Cigaal uu ka geeriyooday sideedii ayuu u daayay, balse waxay ahayd inuu dib-u-magacaabo, xataa hadduu sideeda u daynayo oo uu dib-u-dhaariyo, mase uu samayn arrintaas, ciddina kuma qabsan. Aniga [Maxamed Siciid Gees] xilkii uu igu magacaabay Marxuum Cigaal oo ahaa Wasiirka Arrimaha Dibedda ayaan sidii u sii hayay.

Waxaan goob-joog u noqday wufuudii faraha badnayd ee soo booqanaysay Mudane Daahir Rayaale Kaahin, waxaan xusuustaa wefdi odayaal Hawiye iyo Raxaweyn ahaa oo siday yidhaadeen u yimi inay ka qaybgalaan tacsidii Marxuum Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal, ayaa la kulmay Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin, markuu la hadlayay odayaashaasi waxa uu ku yidhi; ‘*Jagadan [Madaxweynaha] anigu xoog kumaan iman, lacagna kumaan iibsan, qabiilna*

*kumaan iman, sharcigii aannu dhiganay ee aannu ku heshiinay ayaan ku imi, waxaan idin kula talinayaa waxa aad ku heshiisaan ee shirarkiina ka soo baxa inaad socodsiisaan oo ku dhaqantaan, markaas ayey wax idiin hagaagayaan sidayada [Somaliland] oo kale***.'** Erayadaasi oo aad uga qiiraysiiyay nimankii odayaasha ahaa ee la kulmay Madaxweyne Rayaale.

Wufuuda kale waxa ka mid ahaa safiirka Ingiriiska u fadhiya Addis Ababa oo Madaxweynaha kala qaybgalay furitaankii Hotel Ambassador 26-kii June 2002, waxa kale oo booqasho innoogu yimi safiirrada; Switzerland, Masar, Liibiya iyo Italy oo gidigood dalalkooda u fadhiya Nairobi ee dalka Kenya, isla markaana u qaabilsan arrimaha Soomaaliya, waxa isna yimi Wakiilka Xoghayaha Guud ee Jimciyada Quruumaha ka dhaxeysa ee u qaabilsan Soomaaliya oo la odhan jiray Topman.

Waxa ugu xiiso badnaa wefdi ka socday ururka Midowga Yurub oo uu hoggaaminayey nin Sudan ah oo la yidhaahdo Waliid Muusa oo muddo badan Soomaaliya joogay, marna arday ka ahaan jiray magaalada Xamar.

Weftigaas uu hoggaaminayey Waliid Muusa ee la kulmay Madaxweynaha waxa uu weydiistay inay doorashada dawladaha hoose taakulo ka geystaan, arrintaasna way naga aqbaleen, iyadoo noo suurtogashay inay doorashooyinkii kalena ka qaybgalaan, gacanna ka gaystaan kobcinta dimuqraadiyadda Somaliland.

Waxa aan la hubin go'aanka Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin, waxa uu noqonaayo dhinaca murrashaxnimada Madaxweynenimada ee xisbiga UDUB inuu ku ekaan doono xilkiisu dhammeystirka sannadkan oo sidii heshiiskii Boorama uu Madaxweynuhu noqonayo nin ka soo jeeda beesha Isaaq iyo inuu isa soo sharraxayo isaga oo ku dhaqmaya sida distoorku muwaadin walba ugu oggolaanayo oo aannu cid gaara u cayimin xilalka qaranka.

Arrintaas ciddina kamay war hayn, haseyeeshee maalintan uu weftiga Midowga Yurub la fadhiyay ayuu ka badheedhay, kadib markii uu Waliid Muusa weydiiyay su'aasha ah; '*Madaxweyne, adigu ma is sharraxeysaa?*' Madaxadweyne Rayaale waxa uu ugu jawaabay eray Ingiriisi ah oo ahaa; '*Of course*.' Halkaasaan ku ogaaday aniga [Maxamed Siciid Gees] iyo weftigiiba inuu Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin u sharranxan yahay doorasha Madaxweynenimada ee shanta sanno soo socota dhinaca xisbiga UDUB.

Weftigii markii uu noqday ninkaa Suudaaniga ee khabiirka ah warbixintii uu ka qoray socdaalkiisii Somaliland ee uu u diyaariyay madaxdiisa fadhiday caasimadda Belgium Brussels, ayaa waxaan si dadban iiga soo gaadhay nuqul ka mid ah warbixintiisa, isaga oo ku sifeeyey Madaxweyne Rayaale oo uu yidhi; '*Waa lagu qaldamayaa Rayaale ee waa nin fog***.**'

Ayaamahaa xafiiska Wasaaradda Arrimaha Dibadda waxa igu soo booqday niman siyaasiyiin reer Somaliland ah oo uu ka mid ahaa Guddoomiyaha KULMIYE Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) oo aannu sheeko wanaag ahayn, isla markaana aannu isku baranay xukuumaddii uu dhisay Marxuum Cigaal ee 1997-kii, markii mar labaad ee la doortay oo aannu ka wada midka ahayn wasiirradii la magacaabay.

Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) waa nin aqoon sare leh oo waqti Soomaali in yari tegtay arlada Ingiriiska oo waxbaratay ilaa Masters, Degree ku soo qaatay jaamacadaha Ingiriiska, carruurtiisuna waxay ka wada baxeen jaamacadaha ugu waaweyn Ingiriiska, xaaskiisuna waxay ka mid ahayd hablaha faro ku tiriska ah ee ayaanka u helay inay waxbartaan. Markaa Axmed Siilaanyo iyo qoyskiisuba waa qoys reer galbeedoobey (Westernized) oo meel Soomaali yari gaadho gaadhay.

Markaad sidaa u eegto waxaad is odhanaysaa maxaa ku soo celiyay ummaddan dambaysa ee aqoon-darrada iyo qabiilku uu ragaadiyay, gaar ahaan markii uu Guddoomiyaha u noqday jabhaddii beelaysnayd ee SNM.

Bulshada Soomaalidu ma jecla in la kala hormaro oo in dadku sinnaado ayaa la jecel yahay oo aqoon-darada iyo faqriga la wadaago, dadkuna wada qabiil yahay, sida maahmaahdu odhanayso;

‘*Dadku waa wada ciisoo, ninna caaro ma dheera***.’**
Ninka taajirka ah, aqoonyahanka iyo qofka quruxda badan waa la neceb yahay oo nidaamka qabiilka ayaa sidaas oggol, isaga oo falsafadiisu tahay heesta baydkan hoos ku qoran ee uu ninka reer miyiga ahi ku heesay inta uu soo ciyaar guday, isaga oo dhar xunxun sita, ‘*Dhudiyey nin dhalasho huwani, dharka muxuu ku falayaa***,’** isaga oo qaawanaantiisa iyo darxumadiisa ku qarinaya ‘Laandheeraan ahay.’
Haddaba, Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) bulshadaas uu ka horreeyo ayuu ku soo noqday oo doonay inuu la tartamo, isaga oo doonaya inuu Madaxweyne u noqdo dadkan iyo dalkan uu ka aqoonta sarreeyo ee nidaamka qabiilku qalbigooda ku xardhan yahay.
Axmed Maxamed (Siilaanyo) waxa uu iigu yimi xafiiskay, iguma ahayn la yaab inuu ii yimaaddo, waayo sheeko wadaag baannu lahayn sida aan hore u soo tilmaamay, wax badanna waannu ka wada sheekaysan jirnay.
Cabbaar markii aannu sheekeysanaynay aniga [Maxamed Gees] iyo Axmed Siilaanyo, waxaannu iska warraysanay waayaha Somaliland, kadib waraysigaas waxa uu Axmed Siilaanyo igu yidhi; ‘*Waxaan rabaa inaynu siyaasadda ku shuraakowno, oo urur baan furayaaye, oo inaad ururka ila gashid.***’**
Waxaan u sheegay inaan kalsooni weyn ku qabo Siilaanyo ahaan, “*Haseyeeshee, sababo badani aanay arrintaas ii suurtogelinayn, waa midda hore’e; waxaan ahay ninkii aasaasay xisbiga UDUB distoorkiisa, calankiisa, astaantiisa iyo qabanqaabadiisiiba hormood baan ka ahaa, waxa kale oo aan ka mid ahay Guddiga Dhexe ee xisbiga, xukuumaddana jagadan [Wasaaradda Arrimaha Dibedda] ayaan ka ahayd Wasiir oo meel aan hadda kaga baxo ma joogo, sidaa darteed raali baad iga ahaanaysaa*.” Sidaas ayuu ku qancay Axmed Siilaanyo oo aannu isku gacan-qaadnay, igagana tagay, ururkii uu furayna wuxuu noqday xisbiga weyn ee mucaaradka ah KULMIYE.
Waxa waqtigaa isna siyaasiyiintii aan la kulmay ka mid ahaa Engineer Maxamed Xaashi Cilmi, oo isaga aan anigu ballanta ka codsaday inuu xafiiska iigu yimaaddo, isaguna waxa uu oofiyey ballantaydii.
Engineer Maxamed Xaashi Cilmi aqoon badan uma lahayn, haddana uma lihi, waxase uu caan ku yahay nin farahiisa ka ilaashadda dufanka iyo musuqmaasaqa ay madaxda Soomaaliyeed caanka ku noqotay, sidaa darteed bulshadan bahalawday ee ku mamtay musaqa iyo afmiinshaaradu ma jecla.
Waxaan weydiiyay Engineer Maxamed Xaashi Cilmi, ma sidii baad mucaarad ugu ahaanaysaa xukuumadda, mise waxbaa iska kaa beddelay, maadaama Madaxweyne cusubi yimi geeridii Cigaal ka bacdi? Engineer Maxamed waxa uu hadal kooban oo sarbeeb ah igu yidhi; ‘*Cid aanan garanaynini ha i khalado, cid aan garanayaase i khaldi meyso***.”** Halkaa waxa ka muuqatay inuu mucaradnimadii hore ka soo degay oo wax wada qabsi ula diyaar yahay Madaxweynaha cusub ee Daahir Rayaale Kaahin.

Xisbiga UDUB iyo Wasiirradii ku Jiray Golaha Dhexe

Haddaba sidaan hore u soo sheegay waxaan ka mid ahaa xubnaha wasiirrada ee xukuumadda ugu jira Golaha Dhexe ee UDUB, balse keligay kumaan ahayn waxa igula jiray afar wasiir oo aan ku jiro anigu;

1. Maxamed Saciid Maxamed (Gees),
2. Axmed Yuusuf Ducaale
3. Rashiid Xaaji Cabdillahi
4. Qaasim Sheekh Maxamed iyo
5. Cabdillaahi Maxamed Ducaale,

Waxa shanta wasiir nagu wehelinayay Xoghayaha Guud Dr. Cabdi Aw Daahir oo ahaa nin aad uga shaqeeyay, horena u ahaan jiray Wasaaradda Caafimaadka iyo Shaqada oo waqtigaas hirgeliyey barnaamijkii wadaaga ahaa (Cost Sharing) ee ahaa sidii dadweynuhu u maamulan lahaayeen cusbitaalladooda, isla markaana uga qaybqaadan lahaayeen adeegyada caafimaad, barnaamijkaas oo uu fikiradaa kala tasahaday aqoonyahanno, waxgarad iyo hay'ado.

Dr. Cabdi Aw Daahir wuu ka dhex muuqan jiray Golaha Wasiirrada dhexdooda dooddaha ka dhaca markii uu ahaa Wasiirka Caafimaadka iyo Shaqada, waxaannu ka mida ahaa Wasiirrada tirada yar ee Madaxweyne Cigaal erayga kula dhaca oo uu isna tixgaliyo. Waxa kale oo arrimaha xisbiga UDUB xil weyn iska saaray; Axmed Yuusuf Ducaale, Rashiid Xaaji Cabdillaahi iyo aniga [Maxamed Siciid Gees].

Maalin maalmaha ka mid ah waxaannu ku kulanay fadhi Dr. Cabdi Aw Daahir oo Xoghayaha UDUB ahaa iyo Rashiid Xaaji Cabdillaahi, waxa aannu ka faaloonay sida xisbigu u dooranayo murrashaxiintiisa, cidda u noqon karta iyo sida loo xulanayo.

Markaanu taladii rogrognay waxa Dr. Cabdi Aw Daahir soo jeediyay fikrada odhanaysa, '*Inaanay hadda haboonayn in arrintaa laga hadlo ee marka hore ururka UDUB uu ku soo baxo saddexda xisbi qaran, markaasaa laga hadli karaa hawlihiisa kale*.' Halkaas ayaanu arrinkaas ku soo afjarnay, waqtigaas oo uu socotay ololihii doorashooyinka dawladaha hoose la galaayay.

Arrintaas waxa noogu xigtay is-qabashadii Xoghayaha Guud ee UDUB Dr. Cabdi Aw Daahir iyo Madaxweynaha Daahir Rayaale Kaahin iyo xil-ka-qaadistiisii xilka laga qaaday Xoghayenimadiisii.

Madaxweyne Rayaale mar aan arrintaa is-qabsashadooda wax ka weydiiyay waxa ii sheegay, '*Mudane Cabdi Aw Daahir iyo odayaal la socday waxay i weydiisteen in doorashada soo socota Madaxweyne-ku-xigeenkiisu uu ii noqdo Cabdi Aw Daahir, taas oo aan ka diiday, waxaanan ku adkeystay in doorashada soo socota Madaxweynaha uu igu wehelinayo ninka aan hadda doortay Madaxweyne-ku-xigeenka Mudane Axmed Yuusuf Yaasiin*.'

Arrintaas ka bacdi, waxaan ku war helay warsaxaafadeed ahaa inuu Dr. Cabdi Aw Daahir yahay murrashax Madaxweynenimada u tartamaya xisbiga UDUB dhexdiisa, isla markaana uu kula loollamayo Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin.

Halkii arrintaas si dimuqraadi ah loo dayn lahaa, looguna oggolaan lahaa Dr. Cabdi Aw Daahir tartanka murrashxnimada xisbiga UDUB wuxuu ka helo Golaha Dhexe dhexdiisa oo sharci ah, waxaanna xilkii xoghayanimada ka qaaday Guddiga Fulinta sida ay caddeeyeen, taas oo aanay sharci u lahayn, balse xilka Xoghayenimo ka qaadi karaan sida ku qeexan dastuurka xisbiga gole-shir guud ah oo kii lagu doortay ah.

Halkaa waxa ka muuqata xisbiyada Somaliland u samaysmay inay ilaa hadda dimuqraadiyadda iyo sharci ku dhaqanka (Rule of Law) ka fog yihiin oo meel walba ninka madaxda ka ah siduu doonayo loogu fuliyo, inta sharciga meel la iska dhigo, tusaale waxa innoogu filan Guddoomiye ka mid ah saddexda xisbi ee jira, ayaa laga weriyey inuu shirweynihii xisbiga uu yidhi; '*Dimuqraadiyaddu ma aha uun in madaxda la beddelo*.'

Haddaba arrintaas waxay keentay in tiradii Golaha Dhexe ee UDUB oo sharciyan sagaashanka

(90) ahaa, kuwaas oo siddeetan xubnood lagu doortay shirweynihii xisbiga lagu doortay iyo toban Madaxweynaha awood loo siiyay inuu ku darsado oo uu soo magacaabo, waxa maanta tiradiisii kor u dhaaftay boqolaal, iyadoo sharcigii dastuurka waxba laga beddelin.

'Awrka dambe Awrka hore yuu socodkiisuu leeyahay,' xisbiyadii mucaaradka ahaana waxay raaceen waddadii xisbigii xukuumiga ahaa maray ee UDUB, iyada oo mid walba nin iska yeeshay iyo magaca beeshiisana lagu xardhay.

Anigu waxa aannu gaar isugu dhaweyn Axmed Yuusuf Ducaale oo markaa ahaa Wasiirka Waxbarashada, ka sokaw Cabdi Aw Daahir oo ahaa xubinta kale ee saddexaad ee igu wehelisay dhismaha iyo yagleelida UDUB, ayaan sidoo kale isagana la soo qaaday sida loo dooranayo murrashaxa xisbiga uga qaybgalaya doorashada Madaxweynaha, waxaanse weydiiyay; "*Miyaanay fiicnayn in ciddi isla sharraxdo xisbiga gudihiisa Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin, taasoo kobcinaysa dimuqraadiyadda xisbiga dhexdiisa, haba ku soo baxo Madaxweynuhu eh [Rayaale]?*"

Mudane Axmed Yuusuf Ducaale arrintaa ma jeclaysan aan waydiiyey, waxaannu igu jawaabay; '*Geesow fikradaa naga jooji, xisbiga UDUB baa ku kala jabayee*." Maadaama, uu odey weyn oo ixtiraam igu leh ahaa arrintaa aan ka hadlay diiday, ayaan anigu halkaas ku soo af-jaray ka-hadalka murrashaxa isla soo taagaya Madaxweyne Rayaale, dibna umaan soo hadal-qaadin.

Iyada oo uu fikirkaas Axmed Yuusuf Ducaale qabay, ayaa haddana Madaxweyne Rayaale looga dhigay nin ku kacsan oo kursigiisa doonaya, waxa weliba jirtay in Marxuun Cigaal socdaalkiisii ugu dambeyey ee uu ku tegay Ethiopia aniga [Maxamed Siciid Gees] iyo Axmed Yuusuf Ducaale ku wehelinaynay inuu u sheegay Ra'iisal-wasaaraha Ethiopia Atto Meles Sinaawi; '*Xilka waan ka fadhiisanayaa oo uu ku wareejinayo Axmed Yuusuf Ducaale*…' Haddana Axmed Yuusuf Ducaale marna ma hungurayn inuu ku qabsado kursiga Madaxweynaha ee uu ku fadhiyo Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin.

Booqashadii Wafdigii Madaxweyne Rayaale ee Jamhuuriyadda Djibouti

Mudane Madaxweyne Rayaale markii xilka loo dhiibay, waxa uu igu amray inaan dawladda Ethiopia la xidhiidho oo aannu ka codsanno booqasho rasmi ah oo uu Madaxweynuhu ku tagayo dalkooda.

Dawladda Ethiopia waxay noogu ku soo jawaabtay, '*In aanay hadda diyaar u ahayn oo madaxdii dalka ka wada maqan tahay*,' waxaanay jawaabtaas naloo soo mariyey wakiilkooda u fadhiya Somaliland. Mar labaad baannu haddana weydiisanay in aannu booqasho ku tagno Ethiopia, waxay noogu soo jawaabeen, '*In ay markanna mashquul yihiin*.'

Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin waxa uu ii sheegay inuu casuumad martiqaad ah ka helay dawladda Djibouti oo markaas xidhiidhka Somaliland iyo Djibouti aannu wanaagsanayn, kadib markii sigaarkii Ina Boorre lagu gubay magaalada Berbera, arrintaas oo keentay Djibouti inay xidho xadka dhankeeda iyo LC-siiyada ganacsatada reer Somaliland ka furan jirtay Bangiyada ku yaal dalkeeda, isu-socodkii dayaaradaha, badda iyo dhulkuna oo dhammaantood la wada la joojiyey.

Xaaladda ka dhex taagan labada waddan [Somaliland iyo Djibouti] iyadoo meel xun maraysa ayuu Marxuum Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal kaga dhintay, Madaxweyne Rayaale-na waxa uu jecleystay inuu Ethiopia ku horreeyo inta aannu Djibouti tagin, balse dawladda Ethiopia ayaa ka madax-adaygtay booqashadaas, ugu dambeyntiina waxa uu ku go'aan-qaatay inuu fuliyo martiqaadkii uu ka helay Djibouti.

Waxa xiiso mudan waqtigii uu Marxuum Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal Madaxweynaha ka ahaa Somaliland xidhiidhka laba dalka iyo wararku loo soo marin jiray ee dhinaca Djibouti niman Habar-Awal ah oo maamulka Djibouti wax ka ah, sida Wasiirkii hore ee Arrimaha Dibadda Mudane Cali Cabdi Faarax iyo Guddoomiyaha Bangiga Dhexe Jaamac Xeyd ee dawladda Djibouti. Balse, hadda markii uu Mudane Rayaale madaxntimada qabsaday waxa isku xidhkii bilaabay isaga iyo Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle niman Samaroon ah oo maamulka Djibouti ka tirsan, gaar ahaan ninka Shay la yidhaa ee Qunsulka Safaarada Djibouti ku leedahay magaalada Jiddah ee dalka Saudi Arabia, marna ahaan jiray maamulaha Air Djibouti ee Hargeysa sannadihihii 80aadkii, markaas oo Mudane Daahir Rayaale Kaahin uu haystay laanta socdaalka Hargeysa.

Haddaba markii Madaxweyne Daahir Rayaale uu ila socodsiiyay martiqaadka Djibouti uu ka helay, waxaan ku dhiirrigeliyay inuu iska hubiyo martiqaadku inuu dhab yahay oo uu toos ula hadlo Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, si aannu sidii Marxuum Cigaal aannu ku hungoobin.

Maalintii dambe ayuu ii sheegay Madaxweynuhu inuu toos uga helay Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, tagayana berrito oo walba aniga [Maxamed Siciid Gees] iyo Cabdillahi Xuseen Iimaan Darawalna [Wasiirka Dib-u-dejinta] aannu raacayno, sidaas ayaanu ugu baqoolnay magaalada Djibouti 20-kii June 2002, sagaalkii subaxnimo (9:00 am), halkaas oo nalagu soo dhaweeyey, iyadoo naloo galbiyay qasriga madaxtooyadii oo uu nagu qaabilay Madaxweynaha Djibouti.

Markii aannu dhammaysanay kulankii Ismaaciil Cumar Geelle, ayaa nala dajiyey Hotel Sheraton, waxayna ku beegnayd maalin Khamiis markii aannu ka degnay Djibouti, iyada oo qado iyo fadhi uu gurigiisa noogu sameeyay Ra'iisal-wasaaraha dawladda Djibouti Mr. Daleyti Maxamed Daleyti oo ka soo jeeda qoomiyadda Canfarta, martiqaadkaas oo Wasiirro kalena ka soo qaybgaleen.

Maalintii Jimcihii waxa gurigiisa nagu martiqaaday qado iyo fadhi, Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, waxaan xusuustaa in aan ag-fadhiyey Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle markii miiska qadada aannu ku qadaynayn.

Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle oo ah shaqsi aad u ururiya taariikhda iyo dhaqanka Soomaaliyeed, halkaas waxaan uga yar sheekeeyay cilmi-baadhis aan ku sameeyay xidhiidhka dadka Soomaaliyeed iyo ilbaxnimadii dadkii Masaaridii hore dhinaca afka iyo dhaqanka ee ay wadaagaan.

Haddaan ka yar baxo dhinaca siyaasadda, waxaannu arrintaas taariikhdii hore ee Soomaalida ka bilaabantay magaalada Jabuuti mafrash uu lahaa Xildhibaan Antuwaa Faransuwaa, halkaas oo ay isugu iman jireen Soomaali ka kala timi arlada Soomaalidu deggan tahay oo leh Abwaanno, Qoraayo, Aqoonyahanno iyo Heesaayo.

Halkaas ayey ka bilaabantay in ummaddii Soomaaliyeed oo is dishay, kala qaxday oo burburisay wixii ay soo dhisatay oo dhan Jaamacado, Warshado, Tiyaataro, Maktabado, Cusbitaallo mood iyo maalba wixii hoosyaalay burburisay oo u kala qoqoban tahay ardaayo, sidii karaamadoodii loogu soo celin lahaa mar hadday ku kala faquuqantay xaggii siyaasadda iyo wada noolaanshaha.

Bal dhaqanka ay wadagaan in cilmi-baadhis lagu sameeyo, dadka hawshaa galay dad is-og may ahayn, qofba meel uun buu ka bilaabay, dabadeedna mafrashkaas ayaa lagaga sheekayn jirey sheekooyinkaa oo ku fiday arlada Soomaali deggan tahay oo dhan, sidii qofba qof ugu sii tabinayay, waxay noqotay wax laga sheekaysto oo qabyaaladdii iyo siyaasaddii ka baxsan oo ay dadku wada raali ka yihiin oo aan la isku qabsanayn.

Cilmi-baadhistii ninba meel ayay la gashay, anigu waxaan xiiseeyay fartii hore ee Masaarida, halkaas oo aan ka helay waxyaalo badan oo dadka Soomaaliyeed ay wadaagaan iyo afkooda, dadbaa waxay galeen dhinaca diimaha iyo kutubta samaawiga ah sida Qur'aanka iyo Baybalka, waxay ka soo heleen erayo, weedho afka Soomaaliga la macno ah oo la mid ah iyo sheekooyin carrada Soomaaliya laga yaqaan. Dad waxay ka galeen xagga afafka, iyagoo afka Soomaaliga saldhig uga dhigaya afafka kale ee dunida lagaga hadlo, qaar waxay ku talax-tageen iyagoo ku doodaya in dadkuba markii hore abuurtoodu ka bilaabmaantay arlada Soomalida iyo Geeska Afrika.

Arrimahaas waxay daaha ka fureen taariikhda duugan ee aan cidi war u hayn Geeska Afrika, gaar ahaan dhulka Soomaalidu ka degto, waxay noqotay mawduuc qurux badan oo laga sheekaysto oo lagu faano muddadaa dadka Soomaalidu *tiiha* galeen.

Waxaan xusuustaa aniga oo Wasiirka Maaliyadda ah waqtigii Marxuum Cigaal, waxa ila soo xidhiidhay mac-had taariikhda baadha oo Faransiis ah sannadkii 2000, kuwaasoo aan ku martiqaaday inay Somaliland yimaaddaan, arrintaas waxay keentay taariikhda laga helay Degmada Laas-geel ee caan baxday.

Waxa kale oo iyana xiiso badan yeelatay jaamacad ku taala Denmark oo baadhitaan ku sameysay dad Soomaali ah oo qaxooti ah oo dhinaca DNA-da laga helay inay yihiin meesha ay ka soo unkantay dadyawga caalamka deggan ee ilbaxnimada iyo sida wax loo beerto qaarada Yurub iyo Bariga Dhexe ee Aasiya ku fidiyay, dadkaas oo wadaaga DNA-da (E3B1), dadkaas oo laga helo Iraq, Syria, Turkey, Lebanon, Israel, Greek, Italy, Spain, Portugal, Waqooyiga Afrika sida Morocco iyo Algeria, Faraaciinadii hore ee Masar, dalalkaas inta badan boqolkiiba Labaatan ilaa Soddon (20% - 30%) ayaa DNA-daa leh, Soomaalidana boqolkiiba siddeetan (80%) ayaa leh, waxay dadkaas asal ahaan ka soo jeedaan Geeska Afrika ayaa la odhan karayaa.

Waxa kale oo dadkaas iska leh DNA E3B1laga helaa amma nool yihiin Waqooyiga Yurub iyo labada qaaradood ee Maraykan (Koonfurta iyo Waqooyiga), waxa halkaa ka muuqanaysa sheekooyinkii aannu mafrishka Antuwaa ee aannu dhibaatooyinka isku ilowsiin jirnay in wax badani ka tisqaadeen oo ay ka rumoobeen.

Haddaba Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle xiisaha uu u hayo dhaqanka Soomaalida ee gacan u siiyo ciddii kor u qaadaysa dhaqanka amma taariikhda dadka Somaaliyeed, oo ilaa hadda uu wado iyo xidhiidhka uu mafrashkaas uu la lahaa, ayaa wax badan suurtogeliyey.

Haddaba markii aannu qadadii arrimaha kaga haasawnay ayaanu wada fadhiisanay mafrash caan

ah oo gurigiisa ku yaal oo si qurux badan loo habeeyay, oo bahashii badeecada la odhan jiray wada taalo, iyada oo dhinaca Somaliland waxaannu ahayn Mudane Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin, Mudane Cabdilaahi Xuseen Iimaan (Darawal) iyo Anigoo ah Maxamed Siciid Maxamed (Gees).

Dhinaca reer Djibouti waxay ahaayeen Mudane Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle iyo Wasiirka Arrimaha Dibadda Cali Cabdi Faarax, Wasiirka Arrimaha Gudaha Cabdiqaadir, Wasiirka Shaqaalaha Mudane Barkhad, La-taliyayaal Madaxweyne oo kala ah Mr. Taani, Aadan Sheekh iyo Ambassador Shay.

Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle ayaa nagu soo dhaweeyay fadhigii, waxaanna uu ku martiqaaday inuu furo hadalka Mudane Daahir Rayaale Kaahin, ayaa si kooban uga hadlay siday dadka labada dal ku nool isugu xidhan yihiin iyo in khilaafkii siyaasadeed meel la isla dhigo oo labada dal xaashi amma bog cusub furtaan dhinaca xidhiidhkooda, waxna wada qabsadaan ayuu ku soo gunnaanaday hadalkii.

Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin uma dhalan qof hadal badan amma aftahan ah, aniga [Maxamed Gees] iyo Cabdillaahi Darawal ayuu hadalkii nagu soo wareejiyay, guud ahaan waxaannu uga warranay nabadda, horumarka, maamulka iyo dib-u-dhiska halka Somaliland ka gaadhay, iyadoo taageero muuqda aan ka helin bulshoweynta caalamka, haddana ku taalaabsa doorashooyin is-daba-joog ah oo mabda'a xisbiyada badan ku dhisan, sidaas oo nabaddu ku jirto.

Intii Somaliland ku soo korodhay Mandaqada Geeska Afrika marba marka ka dambaysa xuduuda aan la leenahay dalalka jaarka ah nabadgalyadoodu sii xoogaysanayso iyo xidhiidhka ganacsiga aannu la leenahay uu sii kordhayo.

Waxaan ku adkaynay in dawladda Djibouti xil gaar ahi ka saaran yahay gacan-ka-siinta Somaliland xagga xidhiidhka guud ee ay la leedahay, gaar ahaan wadamada Carabta, annaga dul maray wadahadalkii.

Waxa xiiso mudan inaan idiin soo gudbiyo hadalkii Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle iyo aragtidiisii ku wajahnayd dhinaca Somaliland uu ka yidhi, taas oo dad badan oo reer Somaliland ahi aanay fursad u helin inay wax ka ogaadaan oo warar ku tiri-kuteen ah soo gaadheen.

Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, wuxuu hadalkiisii ku furay isaga oo ka sheekaynaya taariikhdii dawladda Djibouti intii xornimada qaadatay iyo xidhiidhkii ay la lahayd waddankii la odhan jiray Soomaaliya ilaa waqtigan aannu la joogno.

'*Waxaannu xornimada qaadanay 27-kii June 1977, wax yar kadib waxa dilaacay dagaalkii dhexmaray Soomaaliya iyo Itoobiya, dagaalkaas oo dad badan oo reer Djibouti ah, una badnaa askartii iyo dadweynihii, ayaa ku biiray jabhadihii iyo ciidammadii Soomaaliyeed ee ka dagaalamayay degaanka ballaadhan Soomaalidu degto ee ka tirsan dalka Ethiopia, dhaawaca dadka Soomaaliyeedna waxa la keeni jiray cusbitaallada Djibouti.*

Dawladda Ethiopia waxay nagu eedaysay in aannu dagaalka ka qaybgalnay, iyadoo caddaymo ku keentay teesarooyinkii ay siteen dadkii ka dagaalamayey jiidaasi oo Jabuutaawi ah, dhinaca kale madaxdii dawladda Soomaaliya waxay nagu dhaliilayeen maxaad dagaalka noogala qaybgeli weydeen, waxa aanayse war ka hayn in waqtigaasi dawladda Djibouti aanay ciidan qaranba lahayn. 'War la'aan baa wadaadadda hoday.'

Is-afgaran la'aantu halkaasay ayey ka bilaabantay, markii dagaalkii lagu jabiyay Soomaalida ee is-qabadkii siyaasi ka dhex bilaabmay dalka Soomaaliya, waxa dawladda Djibouti isku dayday in wadahadal iyo dib-u-heshiisiin ka dhex furto jabhadihii la dagaalamayay iyo maamulkii Xamar.

Haseyeeshee, nasiib-darro qolo walba waxay nagu eedaysay in aannu dhinaca kale la socono, markii maamulkii laga riday Xamar, annagu waxaannu isku daynay inaannu heshiisiino, markiiba shir baannu ku qabanay Djibouti oo isugu yeedhnay kooxihii oo dhan, isla markaana aannu isku daynay in aannu dawlad lagu wada jiro oo heshiis lagu wada yahay dhisno, ayaa

waxa qolodiinan Somaliland uu u socday waqtigaas shirkii Burco, kaas wefti aannu idiin soo dirnay ku warkeeneen inay Somaliland taladoodii goosteen oo aanay shirka Djibouti shaqo ku lahayn, sidaasi baannu kaga aqbalnay oo kula shaqaynay.
Ayaan-darro, wax yar ka bacdi Cali Mahdi-gii Djibouti Madaxweynaha lagaga caleemo-saaray General Caydiid ayaa ka qaaday, Cabdiraxmaan Tuur-kii Madaxweynaha Somaliland ee Burco lagu doortayna intuu Djibouti yimi ayuu yidhi, 'Waxba kama jiraan Somaliland ee waan ka noqday.'
Labadii qayboodba dagaallo hor leh ayaa ka bilaabmay Koonfurtii Soomaaliya iyo Waqooyigii Soomaliyaba [Somaliland], haddaanu dawladda Djibouti nahay waxaanu go'aansanay in aannu siyaasadda Soomaaliya faraha kala baxno, dadweynaha Soomaaliyeedse Djibouti u furnaato kii degaya, kii ka ganacsanaya, kii ka dhoofaya oo aan lagu cidhiidhyin iyo passport-ka aan dawladda lahayn laga oggolaado oo aannu ictiraafsan nahay, muddo ayaanu arrintaa wadnay sidaasay ahayd, haddana waannu ka joogi waynay telefoonnadoodii iyo waraaqahoodii wufuudooda oo nagu dhago-hadlaysa, iyagoo leh; 'Waar yaad nooga heelinaysaan ma Axmaarada iyo Kukuuyada ayaa na heshiisiinaysa, idinkaa cid walba noogu xiga ee wax nala qabta.'
Arrintaas ayaa mar saddexaad nagu kaliftay in aannu galno dib-u-heshiisiinta Soomaaliyeed oo aannu qabanay shirkii Carta. Annagu [Djibouti] Somaliland waxaannu ku marti qaadnay in ay yimaaddaan oo warkooda ka dhiibtaan halkaa [Carta], waayo annagu shaqo idin kuma lihin haddaad kala go'aysaan iyo haddaad isku noqonaysaan oo idinka ayay idiin taallaa, ma waxaad noogu cadhoonaysaan oo na leedihiin: Soomaali ha heshiisiinina oo ha isu keenina?" ayuu yidhi Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, hadalkiisa sii wata waxa uu tilmaamay weftigii reer Djibouti ee uu watay Guddoomiyaha Baarlamaanku ee laga celiyey Airport-ka Hargeysa, "Dadka waxaad doonaysaan waa loo sheegaa ee maxaad dib ugu celiseen qof idiin marti ah, ciddina idimay khasbayn, dhaqankii ayaad meel kaga dhacdeen.
Aaskii Cigaal diyaarad wefti Djibouti ahaa oo iyana cirka laga ceshay, waar goormaa tacsi la isu diidi jiray dhaqankii baad ka baxdeen, weftigiina iyadoo diyaaraddu cirka mareysa ayaa lagu ceshay, wefti Xabashi ahina wuu joogay.'
Madaxweyne Geelle waxa uu ku dheeraaday arrinkii sigaarkii Cabdiraxmaan Boorre ee waqtigii Cigaal Madaxweynaha ahaa la gubay lagu gubay Berbera, isaga oo ka hadlayeyna waxa uu yidhi; '*Halkan Djibouti dadku waa wada Jabuutiyaan, waanna laga wada ganacsadaa oo laga wada shaqaystaa, ganacsato reer Djibouti ah ayaa dhinaca Berbera ganacsi ka bilawday, iyagoo isticmaalaya baananka Djibouti ku yaal, nimankaas waxay u badnaayeen rag ka soo jeeda beelaha Isaaq, laakiin reer Djibouti-yaan ah, waxa soo raacay hal nin oo Ciise ah, kaasoo ah Cabdiraxmaan Boore, kiibaa la yidhi reer Somaliland ma tihid'e oo xoolihiisii ayaa la gubay, waar arrintaa arrin dhaqanka ka baxsan baannu u aragnaa*.'
Halkaas ayuu la maray Mudane Ismaciil isaga oo baanaya, hadalkaas kadib waxa uu soo saaray oo uu na tusay warqad qoraal uu yidhi, Madaxweyne Cigaal ayaa ii soo diray uu yidhi, mar dawladda Djibouti weydiisatay in qaxooti Djibouti jooga lagu soo celiyo Somaliland, Cigaal waxa uu noogu soo jawaab-celiyey warqadan; '*Ciise dhul uma hayo anigu, dhulkiisii Samaroon baa qaadatay*.'
Arrintaas waan la yaabay qoraalkaas ah, waxa kale oo aan la yaabay waxa uu Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle uga dan lahaa markuu na tusaayay qoraalkan isagoo Madaxweyne Daahir Rayaale Somaroon ah fadhiyo, taas oo sheekadii dheerayd soo xidhantay, iyada oo wasiirradiisii [Ismaaciil Cumar Geelle] aanay ciddi ka daba hadal, fadhigiina sidaas ayuu noogu soo xidhmay.
Maalintii Sabtidii aniga [Maxamed Siciid Geed], Cabdillaahi Darawal iyo Cali Cabdi Faarax Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Djibouti iyo Wasiirka Daakhilaga ayaa wada qornay heshiish

dhowr qodob ah oo nuxurkiisu ahaa in gacancsigii iyo xidhiidhkii la isu furo, dacaayadahana la kala daysto, in muwaadiniintu labada dhinacba ka wada ganacsan karto, in guddi wadaag ah la sameeyo oo nabadgelyada xuduudaha labada dal ka shaqeeya.

Heshiiskaa waxa lagu soo saaray war-murtiyeed ay labada dhinacba saxeexeen, labada Wasiir ee Arrimaha Dibadda anoo Maxamed Siciid Gees ah iyo Cali Cabdi Faarax oo dhinaca Djibouti ah, iyada oo laba nuqul oo ku kala qornaa Soomaali iyo Faransiis ku kala saxeexanay, taas oo noqonaysa markii ugu horraysay, uguna dambaysay ee wefti reer Somaliland ah oo booqasho ku tagay waddan kale ay waddankii soo wada saaraan war-murtiyeed lagu wada saxeexan yahay, horena uma dhicin gadaalna kama dhicin ilaa haatan, arrintaasina waxay wax weyn ka tartay dhaqaalihii, isu-socodkii dadka iyo ganacsatada Somaliland, oo heshiiskaas waxa uu noqday mid lagu liibaanay.

Haseyeeshee, maalintii Axaddii ee taariikhdu ku beegnayd 23-kii June 2002 ayaanu dib ugu soo laabanay Hargeysa, iyadoo markii weftigii dalka ku soo noqday, ayaa jaraa'idka iyo mucaaradka aad u dhaliilay socdaalkii Madaxweyne Daahir Rayaale uu ku tegay dalka Djibouti, iyagoo iska indho saabaya waxtarka weyn ee laga helay marti-qaadkaas.

Haddaba, markii aan garoonka Djibouti ka soo duulaynay, ayaa waxa dhacday arrin xiiso leh oo ahayd in annaga [weftigii booqashada ku tegay dalka Djibouti] oo diyaaradda kornay, ayaa waxa soo fuulay nin, dabadeedna Madaxweyne Rayaale wax hoos ahaan ugu sheegay, Rayaale-na diyaaradii ayuu ka dhaadhacay oo waxa uu dib ugu noqday qolkii VIP ee madaarka. Cabbaar kadib waxa soo koray diyaradii Madaxweyne Rayaale oo gacanta ku sita boorso aannu markii hore sidan.

Markaas ayaan xasuustay markuu marti-qaadka ii sheegayey ee aannu xafiiska Madaxtooyada ee Hargeysa Somaliland joognay inuu igu yidhi; '*Qoladii Samaroon ee reer Jabuuti baan la hadlay oo aan kula kaftamay waar Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle waxba kulama dhacaysaan, waxay iigu jawaabeen, 'Waar adigu kaalay lacag ayaan kaa siinaynaaye*.' Aniguna maan weydiin lacagta in Somaliland la siinayo iyo in isaga la in siinayo.

Markii aan boorsada arkay ayaan hadalkii gocday, Cabdillaahi Dareewal oo i ag fadhiyey ayaan ku kula kaftamay, waar ninka sooryada qaybteena inoo weydii. Cabdillaahi Dareewal ayaa iigu jawaabay, '*Waan weydiin lahaa ee sawtan marwadii la socoto*.'

Dad badan oo reer Somaliland ah ayaa si aan cilmi ahayn u dhaliila xidhiidhka siyaasadeed ee dalka Djibouti, waxase aan qabaa in Somaliland aqoonsigeedu ku xidhan yahay Djibouti oo aqoonsata, taas oo furre u noqonaysa waddamada Carabta iyo Afrikaba, markay ka markhaati-kacdo jiritaanka Somaliland.

Ayaan-darro, hoggaankii Somaliland wuu ku guuleysan waayey inuu xataa xidhiidh caadiya la yeesho oo joogto ah, *waxa la yaab leh haddii arrinteeda Somaliland ka dhaadhicin kari weyday dawladda Djibouti oo dadka madaxda ka ah qof-qof loo garanayo oo la isku wada xidhan yahay, kuma guuleysan karto inay ka dhaadhiciso arrinteeda Xabashi iyo Kukuuyo. Ha ka yaabin*!!!

12-kii November 2003 aniga oo markaa dawladdii ku jirin ayaan tagay Addis Ababa ee dalka Itoobiya, waxa isla maalintaa Hargeysa baabuur ku soo galay safiirka dawladda Ingiriiska u fadhiya Itoobiya, kadibna isla baabuurkii ugaga sii gudbay dalka Djibouti, halkaasna uu kula kulmay Madaxweyne Ismaciil Cumar Geelle.

Aniguna waxa aan ka war helay meelo xogogaal ah inuu safiirka Ingiriiska ku yidhi; '*Wax la qabta Somaliland wax bay qabsataye, qolodii kale waxba noqon waayee***.**' Hiilkaas wax badan ayuu u taray Somaliland, laakiin dad badani ma oga, wax badan ayuu sidaas oo kale ka qaban kari lahaa waddamada Carabta hadduu inoo hagar-baxo.

Martiqaadkii Ethiopia ee Madaxweyne Rayaale

Martiqaadkii uu Madaxweyne Rayaale ka sugayay Ethiopia ayaa dhaboobay 22 July 2003, annaga oo joognay Ethiopia saddex casho, dalkana waxaannu soo noqonay Somaliland 25 July 2003.

Socdaalkaas uu Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin iyo weftigiisa uu hoggaaminayey uu ku tegay dalka Ethiopia waxa ku weheliyay aniga [Wasiirka Arrimaha Dibadda] iyo Wasiirka Ganacsiga oo markaa uu ahaa Rashiid Xaaji Cabdillaahi, waxana na qaabiley Ra'iisal-wasaaraha Atto Meles Zanawi, Wasiirka Arrimaha Dibadda Mudane Sayun Misfin iyo Madaxweynaha Ethiopia.

Dalka Ethiopia xukunku wuxuu gacanta ugu jiraa Ra'iisal-wasaaraha, waayo Madaxweynuhu waa iska xil-sharafeed, madaxda dalkaas mid waliba gaar ahaankiisa ayuu ula kulmay weftiga uu hoggaaminayey Madaxweyne Rayaale.

Madaxweyne Rayaale waxa uu Ra'iisal-wasaaraha Ethiopia toos u weydiistay aqoonsi, maadaama laba dal oo saaxiib ah la yahay, Meles Zanawi-na waxa uu arrintaas kaga jawaabey sheeko-baraley laga yaqaano carada Ethiopia oo murtideedu tahay: '*Sida loo karin lahaa rah biyo ku dhex jira iyada oo aannu rahu ku dareemin*.' Sidaasaanu Somaliland ictiraafkeeda u wadnaa, sheekadaas way naga qoslisay, mase garan wuxuu ula jeeday Ra'iisal-wasaare Males Zanawi.

Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Ethiopia Mr. Sayun Misfin oo quraac shaqo noogu sameeyey Hotel Sheraton oo aannu degganayn weftigayagu, intii aannu fadhinay hadallo fiican ayaa la is dhaafsaday, Madaxweyne Rayaale Wasiirka Arrimaha Dibadda uu ku yidhi; '*Labada waddan ee Ethiopia iyo Somaliland waxa xukunkii hadda gacanta ku haya niman dhallinyaro ah [Males iyo Rayaale], sidaa darteed waa inaynu xidhiidh cusub oo saaxiibtinimo oo kii hore ka duwan ka dhisnaa Geeska Afrika*.'

Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Ethiopia isaga oo arrintaa ka jawaabaya waxa uu si kooban u yidhi; '*Waa dhab, labadeenu isku da' baynu nahay oo kontonkii wax baa inoo dheer, haseyeeshee Ra'iisal-waasaruhu [Meles Zanawi] wuu innaga yar yahay oo waa 45 jir*.'

Hadalkaas markii uu yidhi Wasiirka Arrimaha Dibadda ayaan hoosta iskala xanshaashaqay oo waxa ii muuqatay inaan anigu [Maxamed Siciid Geed] ka wada weyn nahay ragga aannu meesha ku wada fadhinay.

Dawladda Ethiopia marnaba ma noqonayso dawladda ugu horraysa ee siisa aqoonsiga amma ictiraafka Somaliland, sababta oo ah qaybta kale ee Soomaaliya ayay iyaduna danaynaysaa, waxay dantu ugu jirtaa oo ay ku dedaalaysaa inay hesho dawlad Soomaaliyeed amma dawlado Soomaaliyeed oo la saaxiiba ah dalkeeda, haseyeeshee dhinac kaliya dani uguma jirto.

Maamulka Ethiopia ka dhisan ee ERDPF waa nidaam xoog ku qabsaday talada dalka oo aan ku iman rabitaanka shacabka, isla markaana ka soo jeeda qoomiyada Tigreega oo ah dad yar oo lagaga badan yahay waddankooda, balse waxa uu had iyo goor u-dhego-nugul yahay wixii ka imanaya dhinaca nabadgelyada.

Markaa dawladda Ethiopia waxa siyaasaddiisa xukuma qolooyinka nabadgalyada (security) gacanta ku haya oo la dhageysto, sidaa awgeed waxa aan suurtogeli ahayn in siyaasad firfircoon oo dhinaca bulshada iyo dhaqaalaha ah uu dhexmaro Somaliland iyo iyaga [Ethiopia].

Muddadaa labada maamul ay ku soo biireen Geeska Afrika waxa hirgalay diyaaradda Ethiopian Airline-tu inay isku xidho Hargeysa iyo Addis Ababa iyo weliba laba xafiis oo ku kala yaal magaalo-madaxyada oo fiisayaasha laga qaato iyo waxooggaa alaabo ah oo haya'daha dawladda Ethiopia leeyihiin u soo mara Dekadda Berbera.

Inkastoo dawladda Ethiopia lagu martiqaaday inay baanan iyo caymis ka furato Somaliland iyo Telefoonka microwave-ka ah la isku xidho, nalka xoogga korontada ah noo soo gudbiyaan oo laga iibsado oo mashaariic waddooyinka ah la wada raadsado, wax badani kama hirgelin dhinaca

Ethiopia, maamulka Somaliland-na kama faa'iidaysan waxyaalo badan oo Ethiopia u diyaar ula ahayd inay la qabato.

Maamulka dawladda Ethiopia wax weyn ayaa la waydistay ee wax yar oo la heli karo ciddina iskuma dayin, lamana dabagelin haddii la weysdiisto, balse waxa lagu guulaystay in cilaaqaad caadi ah oo kalsooni leh wadayeeshaan labada dal [Somaliland iyo Ethiopia].

Dadka ku nool Ethiopia oo hadda lagu qiyaasayo inay yihiin 70 milyan, ayaa waxa muddo labaatan sanno ka bacdi ah tiradoodu noqon doonto 140 milyan oo way laba-laabmi doonaan, sidaas darteed kuma filnaan doonto Dekadda Djibouti si kasta oo loo wayneeyo.

Dawladda Ethiopia waxay ku qasbanaan doontaa inay hesho adeegsiga dekedadaha Eriteriya ee Badda Cas ku yaal amma kuwa badweynta Hindiya iyo Gacanka Cadmeed ee ku yaal carrada Soomaalida, si heshiis nabadeed ah amma xoogba ha noqotee, arrintaasina waxay u baahan tahay in maskaxda lagu hayo, laguna talogalo intay goori-goor tahay.

Martiqaadkii Shirkadda SGS ee Swizerland

Bishii 8-dii August sannadkii 2002, ayaan martiqaad ka helnay shirkad reer Switzerland ah oo la yidhaaho SGS, taas oo kharashka tigidhada iyo hotelkii aannu ku degnayba iyadu qabtay, waxayna nalagu qaabishay soo dhawayn heer sare ah aniga oo markaa ahaa Wasiirka Arrimaha Dibedda ah iyo Wasiirka Xannaanada Xoolaha oo markaas ahaa Saleebaan Koore iyo dhakhtar xannaanada xoolaha ah oo la yidhaaho Dr. Cali Yuusuf, haddana xildhibaan ah, waxaannu tagnay magaalada Geneva.

Shirkadda SGS waxaannu kala hadalnay in dawladda Somaliland iyo shirkadoodu wadayeeshaan heshiis shahaado caafimaad oo magaceeda ah xoolaha lagu dhoofiyo, iyadoo xeryo karantiimo ah oo lagu tallaalo intaanay xoolaha dhoofin iyo shaybaadho ay maamulaan laga sameeyo gudaha Somaliland, gaar ahaan magaalada Burco ee Gobolka Togdheer, meel Hargeysa ah, Tog-wajaale, Berbera iyo waliba inay shirkaddu hubiso maraakiib xoolaha loogu talogalay in lagu qaado xoolaha, isla markaana si casri ah xoolaha loo dhoofiyo xoolaheena, iyadoo neef waliba uu leeyahay shahaado caafimaad.

Heshiiskaas ayaa naloogu yeedhay in aannu tagno magaalada Geneva, halkaas oo aannu qaybtiisii hore ku soo wada saxeexnay, balse dadku kamay war qabin sheekadaas shirkadda SGS sida ay u bilaabantay, iyadoo mar-marka qaarkood magaceeda lagu soo qaado warbaahinta oo dad madaxda ah ka hadlaan mar-mar qaarkood.

Shirkadda SGS waxa warkeedu bilaabmay oo ah shirkad caan ka ah waddanka Switzerland, xafiisyana ku leh waddamo kor u dhaafay boqol oo xaqiijisa alaabta la isu iibgaynayo noocyadeeda, waxay tahay iyo weliba iyadoo hubinaysa sidii lagu heshiiyay inay tahay.

Shirkadda SGS waxaan xidhiidhkeeda bilaabay 1998-kii, kadib markii bishii February ee sannadkaas dawladda Sucuudigu xayiraad ku soo rogtay xoolihii uga dhoofayey dhulkeeda ee uga imanaayay dhinaca Soomaaliya iyo Somaliland.

Sannadkii ka horeeyay ee 1997-kii, Somaliland waxay dibedda u dhoofisay saddex Milyan oo neef xoolo nool oo lagu qiyaasay in ay ka soo gashay dalka iyo dadka xoolaha ka ganacsada lacag dhan 120 ilaa 150 milyan oo dollar, dawladduna dakhliga cashuurta uga soo baxday ka heshay ilaa 10 milyan oo dollar.

Markii dawladda Sucuudigu ku dhawaaqday xayiraada xoolaha, waxa muuqatay in dhaqaalihii Somaliland dhabarka ka jabay, iyadoo markaas loo baahday in la helo hab casri ah oo xoolaha looga gacansado, aniga oo ahaa Wasiirka Qorshaynta waxa ii caddaatay in sheybaadh xoolaheena u sameeya shahaado caafimaad la helo oo ku yaalla Somaliland, lagana helo in aannu noqonaynin wax dawladi ictiraafto, haddii xataa Somaliland la icitiraafo, inaanay ciddina ku kalsoonaan karayn aqoonta sheybaadhyadeeda.

Waxa aad moodaa halka maanta adduunku marayo oo ay fududaatay in cudurradii dadka iyo xayawaanka isaga gudbayaan in loo baahday sheybaadho iyo aqoon casri ah, kaas oo aynu ka bixi kari lahayn oo qudha shirkadaha waaweyn ee caalamiga ah, balse aannu ahayn mid dal yar oo sabool ah oo aan la ictiraafsanayni oo aan aannu awoodi karayn, xataa haddii la ictiraafo.

Dad badan baan kala kaashaday sidii aan u heli lahayn shirkad noocaas oo kale ah, waxase caqabad nagu noqday markiiba Wasiirkii Xanaanada Xoolaha Dr. Axmed Xaashi Fooyaan oo dhakhtar xoolaha ah, kaas oo filanayay in sidii xilliyadii hore ee Soomaaliya mucaawino laga helayo dalalka deeqbixiyaasha ah, una samayn doona Somaliland shaybaadho, ayaa igula qanci waayay in aannu suurtogal ahayn heerkaas oo adduunyadan maanta joogtaa aqoon intan ka sarreysa looga baahan yahay, iyada oo shirkadaas SGS igu soo xidhay Hay'adda WSP oo Swiss ah, sidaasaan xidhiidh kula sameeyay, xidhiidhkaas oo noo socda ayaa bishii May ee sannadkii 1999 la ii magacaabay Wasiirka Maaliyadda.

Nin xafiiskooda Addis Ababa joogay shirkadda SGS ayaa nala soo xidhiidhay oo dhawr jeer Hargeysa noogu yimi oo wixii tirakoob ah ee xoolaha nool la dhoofiyo iyo badeecadda kala

duwan ee la soo dejiyo oo aannu buug sannadkaas ku soo saarnay naga qaatay (Export-Import Statistics 1999).
Booqashadaas iyo xidhiidhkaas waxay dhalisay in hay'adaas u soo dirto Somaliland khabiir xannaanada xoolaha ah, kaas oo dalka soo maray, soona calaamadiyay meelaha xoolaha lagu karantiimaynayo.
Ninkaas oo ahaa nin Faransiis ayaa warbixin la yaab leh oo ka qoray Somaliland, dabadeedna waxa uu shaqo ka helay oo warbixintii uu Somaliland ka sameeyay ku qaadatay hay'ad magaceeda loo soo gaabiyo (OIE) oo xarunteedu tahay dalka France oo madax looga u qaabilsanaha waddamada xoolaha nool dhoofiya oo shuruucda ku saabsan arrintaas soo saarta, waanna sharcigii ay inoo adeegsatay dawladda Sacuudigu markii xoolaha Somaliland xayiraysay.
Shirkaddii nin kale oo cusub ayay arrintii u soo dirsatay, dhakhtar kale oo isagu reer Switzerland ah, nasiib-wanaag Wasaaraddiina Wasiir cusub ayaa lagu magacaabay Saleebaan Koore, inkastoo aannu isagu dhakhtar xoolaad ahayn, balse uu ahaa nin firfircoon oo inuu wax qabto ka muuqatay ahaa, ayaanu si fiican u wada shaqaynay oo aannu isula jaanqaadnay.
Warbixin labaad ayaa laga soo saaray mashruucii iyo sida loo hirgalinayo xagga farsamo ahaan bishii December ee sannadkii 2001, waxa waqtigaas la iga beddelay Wasaaradda Maaliyadda, taas oo keenay in xidhiidhkii shirkaddu markaa la lahayd xukuumadda Somaliland uu joogsaday.
Haddaba, markii Wasaaradda Arrimaha Dibedda la igu magaacabay bishii March sannadkii 2002, waxa dib-u-cusboonaaday xidhiidhkii shirkadda oo keenay in martiqaad la soo mariyay nin la yidhaaho Maxamed Cumar Dubbad oo safaaraddii hore ee Soomaaliya sii jooga Switzerland oo aannu in badan is naqaanay mar dambe ii sheegay sida uu ku dhashay martiqaadkan.
'*Ninkii madaxda u ahaa shirkadda SGS ayaa la beddelay, markii xil-wareejintii uu sameynayey waxa uu ku daray warbixintii ka hadlaysa mashruucii xoolaha ee Somaliland, ninkii maamulaha ee shirkadda oo dhan haystay ahaa aad ayuu u xiiseeyay mashruuca, waxaannu sheegay inuu noqonayo mudnaantiisa koowaad, saamilayda shirkaddahana la ogeysiinayo mashruucan oo ah mid uu magac ku helayso shirkaddu wadan yar oo aan la ictiraafin, dhaqaalihiisa noloshiisu ku xidhnayd laga xayiray, haddaynu wax u qabano waxay shirkadda u noqonaysaa boro-bagaandhe aad u fiican oo sumcaddeeda kor u qaada, sidaasuu degdeg naloogu fidiyay martiqaadkan*,' ayuu igu yidhi Maxamed Cumar Dubbad.
Heshiiska qaybtiisii labaad waxaannu ku saxeexnay Hargeysa oo wefti ay u soo diratay shirkaddu oo uu qaabilay Madaxweyne Rayaale, waxa waddanka Switzerland xidhiidh fiican la leeyahay boqortooyada Sucuudiga iyo dalalka Carabta ee kaleba, waa waddan siyaasaddiisu tahay dhexdhexaad oo aan is-bahaysiyada caalamiga ka mid ahayn oo aan dal kale isticmaarsan amma gumaysan, sidaa darteed qoysaska reer Boqor ee Sacuudiga ayaa ku raaxaysta oo guryo ku leh dalka Switzerland.
Shirkaddu waxay ku guulaysatay in wax alaale wixii Sucuudigu dibedda ka soo iibsanayso ka noqoto cidda ka hubinaysa oo xafiis ka furato magaalada Jiddah, halkaas waxa ka muuqatay inay iyadu labada darafba ka hubinayso markay Dekedda Berbera ka tagayaan iyo markay xaggaa tagaanba, lana ictiraafsan yahay shahaadadooda.
Shirkadda SGS wefti ka socda ayaa yimi Somaliland bishii March ee sannadkii 2003-dii dhexdeedii, kaasoo ujeeddadoodu ahayd inay heshiiskii u dambeeyay la saxeexdaan dawladda Somaliland. Markan waxay ahayd waqti lagu mashquulsanaa doorashadii Madaxweynaha oo wax yari ka hadhsanayd, arrintaas oo ii saamixi weyday in aanan la kulmin weftigaas, iyada oo aan la ina ogeysiin imaatidkooda, anigana [Maxamed Siciid Gees] la igama jeclayn qasriga madaxtooyada.
Weftigaas markii ay dalka yimaaddeen waxa qaabilay Wasiirka Xannaanada Xoolaha oo markaa

ahaa Saleebaan Koore iyo Wasiirka Ganacsiga Rashiid Xaaji Cabdillaahi, Madaxweyne Rayaale-na isaguna dhinaciisa wuu qaabilay, anigana waxa la ii sheegay markay dhoofeen in xaggii kharashka lagu heshiin waayay oo lagu kala tagay, weftigaasina halkaas ayey faro madhni dib uga noqdeen.

Somaliland waxa halkaas innagaga dhimatay himiladii lagu casriyayn lahaa dhaqashada xoolaha, haddii hay'adaas ku guulaysan lahayd inay heshiis aynu kala saxeexano, dalka waxa ka hirgeli lahaa oo dadka soo jiidan lahaa inay kor-u-kacdo xoolo dhaqashada oo maalgalin loo helo oo ah kheyraadka qudha ee aynu leennahay.

Waxa xiiso leh in dalka Switzerland ka tirsan waddamada Yurub dhaqaalihiisu ku tiirsan yahay ilaa hadda noolaha xoolaha, gaar ahaan caanahooda, bal eeg shirkadda NESTLE oo ah Swiss, ayaa sameysa caanaha laga isticmaalo dalal badan oo tirsan Qaaraddaha Yurub iyo Asia.

Arrintaas waa lagu guulaysan waayay, anigana aad bay ii damaqday oo dedaalkaygii shanta sanno waxa uu noqday hal-bacaad lagu lisay, madaxdii middida daabkeeda haysayna waxay dareemi kari waayeen miisaanka shirkaddu u leedahay Somaliland ee Illaahay gacanta u soo geliyay, horaa loo yidhi; **'***Geeso goodir kulaylkaa lagu gooyaa***."**

Marar dambe ayay xukuumadda Somaliland isku dayday inay heshiiskii dib u soo noolayso, waxa kale oo galay dad dilaaliin ah, arrintaasina way socon wayday in mar labaad heshiiskii la cusboonaysiiyo si xoolaheena loogu helo suuq loo iib geeyo.

Waxa xiiso mudan in dawladda Djibouti oo danaha siyaasadeeda aad ugu adag, qorshena ku dhaqanta ayaa Dekedeedii si ay ugu hore mariso la kaashatay shirkado caalami ah, taas oo keentay inay dekedo kale sii dhasho, marka aqoon, maalgelin iyo maamul wanaagsan la yimaaddaan oo aanay kari-karayn dawladaha dunida saddexaad.

Djibouti waxay doontay inay Dekaddeeda ka dhoofiso xoolaha Geeska Afrika oo dhan, iyadoo adeegsanaysa taageero Maraykan ah, si Dekedda Berbera uga soo jiidato dhoofinta xoolo oo ay u noqoto mid hormood ka noqota mandaqada, waanna wax ay xaq u leedahay inay kula tartanto mar haddii aynu innagu ka habsaanay.

Waxa kale oo iyana xiiso mudan markii aannu heshiiska qaybtiisa hore la soo saxeexanay shirkada SGS ee aannu Geneva ugu tagnay, waxa noo weydaartay Geneva oo Nairobi ka soo duulay nin Talyaani ah oo la odhan jiray Tamanini, kaas oo ahaa ninka labaad madaxda hay'adda UNDP ee Soomaaliya qaabilsan ee fadhigeedu Nairobi yahay.

Ninkaas wuxuu u tagay shirkadii SGS, waxaannu waydiistay inay tusaan heshiiskii Somaliland la saxeexdeen, waxa jirtay in qodob ka mid ah qodobadda heshiiska uu xaaraamaynay in daraf saddexaad la tuso heshiiska haddii aan oggolaansho laga helin labada daraf ee wax kala saxeexday (Confidentiality Clause).

Shirkaddii SGS way nala soo xidhiidhay, waxayna noo sheegtay in ninkaas doonayo inuu arko heshiiska ee ma tusnaa, waxaan u sheegay inaan ninkaas shaqo ku lahayn lana tusi karin, sidaas ayaa Talyaanigii faro madhnaan ugu noqday Nairobi.

Arrintaas waxay na dareensiisay in dad badani aanay ka raali ahayn heshiiska lala galay shirkadda SGS, taas oo macnaheedu tahay in aan raali laga ahayn horumarinta dhaqaalaha Somaliland oo ku xidhan horumarinta xoolo dhaqashadiisa.

Haseyeeshee, ilaa maanta xukuumad iyo shiciba ciddina uma soo jeedsan horumarintiisa, xataa carwooyin tuulooyinka iyo degmooyinka lagu qabto oo lagu tartansiiyo xoolo-dhaqatada ninka dibiga ugu miisaanka weyn dhaqay amma wanka ugu miisaanka weyn amma kuwa ugu caano badiya soo bandhiga, laguna siiyo abaalmarin sannadkiiba, arrintani waxay kor u qaadi lahayd xoolo-dhaqashada iyo horumarinta xoolo oo ah laf-dhabarta Soomaalida meel kasta oo ay joogto.

Booqashadii Madaxwaynaha ee Laascaanood

Madaxweyne Rayaale markii xilka loo dhaariyay geeridii Cigaal ka bacdi, wuxuu ku dhaqaaqay tallaabooyin nabadayn ah oo wuxuu shir la yeeshay salaadiintii iyo ururkii ASAD ee ku kacsanaa xukuumaddii Madaxweyne Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal, arrintaas waxay soo afjartay khilaafkii siyaasadda ee ka taagnaa dhinaca ka qaybgalka doorashooyinka iyo samaynta ururrada siyaasiga ah.

Shirkaas uu salaadiinta ASAD raacsan la yeeshay waxa loo malaynayaa inay ka soo baxday talo soo-jeedineed oo ahayd in doorashada iska daayo oo muddada loo kordhiyo, arrintaas oo uu Rayaale ka dhigtay hadal-hays oo ciddii soo booqataba uu la soo qaado isaga oo u sheegaya inuu diiday kordhinta oo uu u badheedhay doorasho aan natiijadeeda la hubin inuu ku guulaysanayo, isaga hore u yidhi; '*Waxaan uga dan lahaa in dimuqraadiyeyntu ka hirgasho Somaliland, taas oo danta ugu jiro dalka*.'

Haseyeeshee, ciddina marna ma waydiin cidda uu kordhin lahayd muddada, illeyn salaadiinta iyo ASAD wax ma kordhiyaane dastuuriyan, mise waa arrin Golaha Guurtida ka timi cidda xaqa u leh inay kordhiyaan.

Si kastaba ha ahaatee, Madaxweynuhu arrintaa hadal-hays ayuu ka dhigtay, waxaannu bilaabay in xubno qoladii ASAD ka mid ah iyo xubno labada gole ka mid ah ee Wakiillada iyo Guurtida in loo diro magaalada Laascaanood oo ay muddo dheer joogeen, iyagoo halkaas wax ka qabtay shaqaaqooyin kala dhexyaalay ardaayada reer Sool iyo dilal la isku haystay.

Haseyeeshee, dhinacii siyaasadda ujeeddadii laga lahaa oo ahayd in la soo mustafeeyo reer Sool laguma guulaysan, taas oo keentay in reer Sool iska xidhaan in laga hadlo siyaasad, kharash badan oo boqolaal kun oo dollar ahna waxa uu ku baxay hawlgalkaas Laascaanood, arrintaas waxay ahayd arrin uu Madaxweynuhu kelidii uu qorshaheeda lahaa isaga oo aan waxba kala tashan Golihiisii Wasiirrada.

Mar aan aniga oo Wasiirka Arrimaha Dibedda ah iyo Madaxweynuhu kulan ku wada yeelanay labadayadu qasriga madaxtooyada, waxaan kula taliyay in aannu waqti badan isaga lumin arrimaha bariga ee ay ka mid yahay Sool, haseyeeshee Madaxaweynaha oo mar madax ka ahaa xafiiskka NSS-ta ee Gobolka Sool, waxa uu aaminsanaa inuu cid walba uga aqoon roon yahay, waxa ka jira Gobolka Sool iyo dadkiisaba, waxayna u muuqatay in aannu qaadan taladaydii.

Wax yar kadib markii waftigii odayaasha Guurtida ahaa ka soo laabteen xarunta Gobolka Sool ee Laascaanood, waxa Madaxweynuhu u diray tiro Wasiirro ah, kuwaas oo xabbad lagala daalay markii ay galayeen magaalada Laascaanood, iyaga oo ku sigtay in baabuurta laga dhaco, iyagana wax la yeelo. Waxa dib-u-soo laabtay ayaamo ka bacdi laba Wasiir oo ka mid ahaa Wasiirraddaas la diray oo kala ahaa; Qaasim Sheekh Maxamed iyo Cabdillaahi Darawal, waxayna warbixin siiyeen Madaxwaynaha.

Madaxweynaha iyo labada wasiir midkoodna golaha lama ay socodsiin arrimaha Gobolka Sool, isaga oo Madaxweyne Rayaale hadal-hayn jiray, odhanna jiray, '*Waxaan tagayaa magaalada Laascaanood, dabadeed waxaan bariga ka soo gelayaa magaalo-madaxda Gobolka Sanaag ee Ceerigaabo*.'

Waxa dadku u qaatay in arrintaas tahay xeelad siyaasadeed oo uu ku qancinayo qolada ururka ASAD oo had iyo goor Cigaal iyo xukuumaddiisa ku xujayn jiray, '*Maxaa wax looga qaban waayey Sool iyo Sanaag-Bari*.' Cigaal wuxuu odhan jiray marka la waydiiyo, '*Maxaad u tagi wayday Laascaanood*.' Waxa uu ku jawaabi jiray; *'Maamul iigama dhisnee ardaagee ayaan marti u noqdaa oo aan ku degaa ma Jaamac Siyaad? Mise Baho-Ararsame? Mise Ugaadhayahan?'* Kuwaasoo ah ardaayada beesha Dhulbahante ee Gobolka Sool deggan.

7-dii bishii December 2002 goor galab ah anoo gurigaygii fadhiya, ayaa Xoghaynta Madaxtooyadu ii sheegtay in madaxtooyada la iga rabo 7-da fiidnimo, aniga oo ka war helay in loo diyaar garoobayay in loo baxo Laascaanood oo Madaxweynuhu tegayo habeenimadaas.

Arrintaas way igu adkaatay, waan la yaabay, waxaan la xidhiidhay Mudane Axmed Yuusuf Ducaale oo waayo-aragnimo badan ku leh dalka, waxaan la socodsiiyay arrinta booqashada Madaxweynaha iyo waftigiisa oo aan ka mid ahay, waxaan ka codsaday inuu Madaxweynaha kala taliyo arrintaas oo uu ka joojiyo socdaalka uu ku tegayo Gobolka Sool.

Balse, Axmed Yuusuf Ducaale waxa uu iigu caqli celiyay, '*Madaxweynuhu mar haddaanu talo ina waydiin inaan loogu tegi karin arrintaas, haddiise aad adigu waxqabto adigay kuu taallaa inaad raacdid iyo inaad ka hadhid*.' Markii uu sidaa igu yidhi Axmed Yuusuf Ducaale aniga talo way igu caddaatay oo waxaan ka fikirayey arrintaas.

Xaalku isaga oo halkaas maraya waxa gurigayga igu soo booqday Axmed Xaaji Cali Cadami oo markaa ahaa Guddoomiyaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka Somaliland, siday wax u jiraan markii aan u sheegay, isaguna waxa uu igu dhiirrigeliyey inaan raaco Madaxweynaha oo aanan ka hadhin, aniguna sidaas ayaan kaga mid noqday waftigii u amba-baxayey magaalada Laascaanood ee Gobolka Sool.

Habeen badhkii ayaannu magaalada Hargeysa oo huruda 12-kii habeenimo ka baxnay xarunta madaxtooyada, kolonyo baabuur ah oo ilaa soddomeeyo ah oo ciidankii illaalada Madaxtooyada oo tiknikadoodii wata ka mid yihiin, booyad shiidaal ah, dhooliyo iyo Land-Cruiserro badan oo madaxdu ku jirtay, maadaama anigu intii aan Wasiirka ahaa gaadhi Land Cruiser ah damcin, isla markaana aanan yeelan, waxa la i siiyay gaadhi bangigu lahaa oo Land Cruiser ah.

Waxa aannu guure ku dhaafay magaalada Berbera oo huruda, isaga oo nalkii baabuurtu isqabsaday dhawr kilomitir, mar Burco iyo Berbera dhexdooda la istaagay ayaan hadal la gaadhay Wasiirka Dib-u-dejinta Cabdillaahi Xuseen Iimaan (Darawal) oo aan weydiiyey, '*Maxaa Madaxweynuhu ka qabanayaa Laascaanood?*' Cabdillaahi Darawal wuxuu iigu jawaabay; '*Madaxweynuhu wuu ka khudbadaynayaa oo habeen baynu joogaynaa*.'

Waxa waagii noogu beryay meel u dhaxaysa Caynabo iyo Burco, Laascaanood waxaannu galnay abaaro 9-kii subaxnimo, tuulooyinkii aannu sii marnay intaanaan gelin Laascaanood ee degaanka Dhulbahante ahayd sida Guumeys, Yagoori, Adhi-cadeeye, Canjiid waa nalagu soo dhaweeyay, iyaga oo dad tubnaa waddada, waxayna lulayeen caleemo iyo calanka Somaliland.

Haseyeeshee, markii aannu galnay buurta kala jeexan ee laga galo Laascaanood, annaga oo wadana kolonyadii baabuurta ahayd, ayaa markii qaybtii u horreysay ay ku leexatay gurigii lagu degayay ee naloogu talogalay labada dhinac ee laamida aannu maraynay xabbad oodda nalagaga qaaday, baabuurtii way kala yaacday, xabbadii way joogsatay, dabadeed waxaannu gaadhay gurigii weftigu degi lahaa, halkaas oo ay nagu sugayeen maamulkii Laascaanood ee Somaliland.

Dadkii waxay noqdeen wax quraacda iyo wax iska seexda hurdo la'aan aawadeed oo meel isku tuura, magaalada dad badani noogama iman, markii la qadeeyay ayaa qaad la dalbaday, waa la fadhiistay ninba meeshuu joogay.

Madaxweynuhu waxa uu soo fadhiistay hoolkii weynaa ee gurigii lagu deggay, qaadkii oo dadkii soo wada gaadhin nin xoogaa sii haystay mooyee, ayaa Madaxweyne yidhi; '*Wasiirradii innaga soo horreeyay ayeynu warraysanaynaa…'* Intaan hadalkii afkiisa ka soo wada dhammaan ayaa nalagu bilaabay xabbad, iyada oo rasaas qoryo waaweyn ka dhacaysa baasuukayaal iyo hubkale ah nalagu soo riday, ninba meel buu isku nabay, Madaweynaha qolkiisii ayaa loolla cararay, dhawr askari oo daarada guriga taagnaana xabbadihii nalagu soo ridayey ayaa ku dhacay.

Talo faraha ayey ka haadday, qofba meel buu isku nabay, tiknikadii askartii la socotay ayaa dibedda looga saaray gurigii oo ka hortagtay qoladii nagu soo duushay, waxa la iswaydaarsaday rasaas oo dhinac walba u dhacaysay, Madaxweynihii ayaa si degdeg ah gaadhigiisii loo saaray, qof waliba baabuurkiisii buu ku booday, xabbadii oo dhacaysa ayaa loo cararay dhinaca koonfureed ee maagaalada oo ay degaan ardaaga Bah-Ararsame oo ka soo jeeda ardaagaa Wasiirka Caddaaladda oo hore u ahaan jiray sarkaal ciidammada, isla markaana ahaa nin dalyaqaan ka ah, iyadoo kolonyadii baabuurta ahayd si habaqle ah isku dabagashay.

Markii laga baxay magaalada Laascaanood, ayaa la joogsaday si la isu soo gaadho oo la isu tiriyo wixii dad maqan iyo wixii baabuurta maqan, DC-gii Caynabo ayaa baabuur kaxaystay si uu casho ugu sii sameeyo waftiga, isaga oo weftiga intii kale meesha taagan yahay markiiba waddadii laamida ahayd ayuu ku dhacay oo Caynabo ayuu gaadhay.

Haseyeeshee, weftiga intiisii kale waxa afka loo saaray hawd iyo waddada Buuhoodle, nimankii Dhulbahante ee dalyaqaanka ahaana waddadaa dheer ayay na mariyeen, gabalkii baa noo dumay, warkiina idaacadda BBC-daa sii daysay wixii ka dhacay magaalada Laascaanood, tuuladii aan soo marnaba rasaas bay nagu soo ridaysay, anana waan ku celinaynay, tuulada Widhwidh baannu ka soo laabanay, waa' soo dhawaadkii ayaanu soo galnay tuulada Oog, markaasaan oo aannu soo gaadhnay Caynabo, dabadeed Madaxwaynihii guri ayaa lagu dajiyay iyo weftigiisii, dadkii kalena meelaa lagu kala dajiyay, casho qabowday oo galabtii la sii sameeyay baannu halkii ku cunay, kadibna waa la iska kala daatay.

Aroornimadii waxaannu nimi gurigii Madaxweynuhu degganaa oo quraac naloogu sameeyey, markaan anigu gurigii imi, waxa markiiba gacanta i qabtay Mudane Cabdillaahi Maxamed Ducaale oo isagu guri la deganaa Madaxwaynaha, waxa uu iila baxay bannaanka meel guriga ka baxsan.

Cabdillaahi Maxamed Ducaale waxa uu ii sheegay isagoo si u werwersan inuu xalay magaalada uu soo gaadhay Mudane Wasiirka Arrimaha Gudaha Ismaaciil Aadan Cismaan oo ka yimi Hargeysa, dabadeedna farriin uu soo gaadhsiiyey Madaxweynaha ahayd; '*Inkastoo aan luloonayay waxa ay farriintu ahayd*; *In Golihii Wasiirrada intii innaga hadhay shir ku yeesheen Hargeysa, shirkaas oo uu guddominayey Madaxwayne-ku-xigeenku Mudane Axmed Yuusuf Yaasiin, waxa lagu go'aansaday inuu Madaxweynuhu Burco fadhiisto oo uu xaalad degdeg ah ku soo rogo dalka, dabadeedna la qaado dagaal lagu qabanayo magaalada Laascaanood oo lagaga hor tegayo Puntland*.'

Markii uu ii sheegay hadalkaas Cabdillaahi Maxamed Ducaale, waxa aannu isla garanay inay arrintan dhabar-jab ku keenayso barnaamijkii dimuqraadiyaynta ee Somaliland ku tallaabsanayso.

Doorashadii ugu horraysay ee dawladaha hoosena waxa waqtigaas ka hadhsanaa toddoba casho, haddii la galo dagaal aan la garanayn wuxuu ku dhammaanayo iyo intuu soconayaba, Madaxweyne Rayaale muddadii Madaxweynimada dhammaystirka ahayd, waxa markaa uga hadhsan bil qudha, waddankuna waxa uu galayaa khalkhal dastuuri ah oo si looga baxo aan la garanayn waxa uu ku dambayn doono.

Aniga [Gees] iyo Cabdillaahi Maxamed Ducaale oo ahaa saaxiibkay, waxaannu isku raacnay in arrtintaas wax laga qabto oo aanay dhicin, isaga oo ka mid ahaa shaqsiyaadka madaxda iyo Madaxweynenaha aan ku dhiirranayn, waxa uu ku kaftamaa; '*Waxan ahay Loyal Kukuyo***.'**

Haseyeeshee, Cabdillaahi Maxamed Ducaale waa siyaasi hal-abuur leh oo qunyar socod ah, kuna dedaala adkaynta nabadda, dhinaca siyaasadda dibedda aad ugu fiicaan oo diblomaasi ah, bashaash ah oo kaftama, waxa uu mar hore gartay laxaadka dawladda Ethiopia ku leedahay siyaasadda Geeska Afrika, toddobadda dal ee ku jira ururka IGAD lix ayey Itoobiya xad la leedahay, biyaha webiyada dalalkaas maraa waxay ka yimaaddaan Ethiopia, weliba dadka Geeska deggan ugu badan ayaa ku nool dalkaas.

Sidaas darteed, Cabdillaahi waxa u wax weyn ka qabtay xidhiidhka labada dal, markuu ahaa Wasiirka Duulista iyo Hawada, waxa uu oggolaaday in diyaaradaha Itoobiyaanku inay ka duulaan Hargeysa iyo markuu Wasiirka Warfaafinta ahaana waxa uu oggolaaday in Radio-ga Somaliland laga sii daayo banaamijyo afka Amhaarada ah ku baxa, maanta oo uu hayo xilka Wasiirka Arrimaha Dibedda wax weyn ayuu ka qaban doonaa xidhiidhka Somaliland iyo Ethiopia.

Cabdillaahi Maxamed Ducaale waxa uu ku kaftamaa xidhiidhka Ethiopia oo uu yidhaahdo; '*Saw*

reer ayayday ma aha oo nin ***Habaar Xabuusheed*** *ah ma ihi*.' Siyaasiyiin badan oo reer Somaliland ah ayaan arrinta Ethiopia aan miisaankeeda weli garan oo u dhaqma sidii lixdamaadkii la aaminsanaa.

Haddaba, saaxiibkay Cabdillaahi Maxamed Ducaale kuma aan hallayn arrinkan nagu soo kordhay, balse waxaan markaa ku tashaday inaan hawshan anigu bilaabo oo aan Cabdillaahi kaga horreeyo ka-hadalkeeda.

Markii la quraacday ayaa Madaxwayne Rayaale shir isugu yeedhay intayadii Wasiirradii ahayd ee la sacday oo ay weheliyaan laba xubnood oo Shirguddoonka Guurtida ah oo kala ahaa; Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ee Golaha Guurtida Md. Sheekh Axmed Aw. Nuux iyo Guddoomiye-ku-xigeenka 2aad ee Golaha Guurtida Md. Siciid Jaamac Cali.

Markaas Madaxweynuhu waxa uu u holaday inuu hadalkii bilaabo, markii aan arkay afkiisa oo uu ka soo baxday erayga ah; '*Xukun degdeg ah*,' ayaan ka hortagay anoo ka cabsi qaba haddii hadalku ka soo wada baxo oo uu go'aan noqdo way adkaanaysaa sida loo jabiyo, madaxda Afrikaanka ahi ma jecla in go'aankooda laga daba hadlo.

Sidaa darteed, Madaxweynaha ayaan ku gar-darooday oo hadalkii aan ka joojiyay, waxaanan ku idhi; '***Madaxweyne go'aanka adigaa iska leh kama dambaysta ah, hase ahaatee intaas oo Wasiir oo kula socota bal horta ra'yigooda dhagayso oo hadhow siday kula noqoto ku go'aanso.***' Madaweynuhu si cadho leh ayuu iigu yidhi; '***Haye, bal adigu bilow!***'

Waxaan si kooban ugu sheegay in xaaladda Laascaanood wixii laga yeelayo aan dib u dhigano markaan Hargeysa ku noqono oo golayaashu isu dhammaadaan, haddase waxa innala gudboon inaan doorashada dawladaha hoose ee toddobada casho maalintii la qaban lahaa ka hadhay u hirgelino, oo aannu ololihii ururka UDUB aan galno.

Wasiirradan kula socda aad nin walba gobolkiisii u dirto si uu uga qeybgalo ololaha doorashada, Madaxweynaha iyo Wasiirrada Sanaag aan ilaa Ceerigaabo socono oo ololihii doorashada aan bilowno oo aan ku soo khatino Hargeysa innaga oo soo marayna Ceerigabo, Burco, Sheekh, Berbera.

Arrintaas oo aannu isla ogayn Cabdillaahi Maxamed Ducaale ayaa igu raacay, Xuseen Faarax Dooddi, Dr. Xasan Ismaaciil, waxa taladii ka hor yimi Cabdillaahi Darawal, Qaasim Sheekh Mohamed, Sheekh Axmed Aw Nuux intaan ka xasuusto. Mar labaad baannu haddana meertadii hadalka ku wada noqonay, markaas oo uu Madaxweyne Rayaale ku qancay taladaydii, waxaananu uga kala ambabixiyay dhammaan gobollada dalka.

Olalahii doorashada waxaannu ka bilownay khudbad lagala hadlay dadka Caynabo, annaga oo sii marnay Gar-adag, Ceel-afwayn ilaa aannu Ceerigaabo ka gaadhnay, meel walba Madaxweynaha si diiran ayaa loogu soo dhaweeyay, isagoo Madaxweyne Rayaale iyo Wasiirrada qaar ka mid ahi fagaarayaasha kala hadlayeen dadweynaha soo dhoweynayey.

Soo-noqodkii Madaxweynuhu wuxuu ka hadlay fagaaraha Burco iyo Berbera, iyadoo maalini ka hadhay doorashadii golaha degaanka ayaanu ku soo noqonay Hargeysa, halkaas oo uu Md. Daahir Rayaale Kaahin kala hadlay dadweynaha Khayriyadda.

Doorashadii dawladaha hoose si nabadgalyo ah ayay ku dhammaatay, waxa 6-dii urur ee ka qaybgalay ugu sad-roonaa ururka UDUB oo ahaa kii xukuumadda, isaga oo helay kala badh tiradii foodadka, shantii urur ee kalena waxay heleen badhkii kale. Doorashadaas oo xalaalaysay sida dastuurku dhigayo inay kala noqdaan ururrada UDUB, UCID iyo KULMIYE saddexda xisbi qaran ee doorashada madaxtooyada u taagan.

Aniga oo aan xil siyaasadeed hayn, kana hadhay siyaasadda, waxaan mararka qaarkood igu soo dhaca haddii subaxdaas Caynabo la joogay ee la cadhaysnaa aanan Cabdillaahi Maxamed Ducaale iyo Wasiiraddii nagu raacay talladii, gaar ahaan Wasiirradii reer Sanaag ee uu ka mid ka ahaa Xuseen Dooddi, maanta dimuqraadiyadda lagu faanaa ma jiri lahayd, waddanku ma jiri lahaayeen.

Raadkii ay ka Tegtay Booqashadii Madaxweynaha ee Lascaanood

Muuqaalka Magaalo Madaxda Sool ee Laascaanood



Waxaan weli ka yaabaa ciddii maamulaysay socdaalkan, guddi iyo qofba ha ahaatee, Wasiirro xayn ah ayaa Madaxweynaha ku weheliyey socdaalkan, kuwaas oo aan ka mid ahaa, waxa aan qabanayno iyo waxa wefdiga xaddigaas lehi ka qabanayo Laascaanood ciddina isma weydiin, xagga nabadgelyadda Madaxweynaha iyo wefdiga cid gaar ah oo u xil saarayd may jirin.

Waxa iigu yaab badnayd taliyaha booliska iyo taliyaha ciidanka qarankuba markay labadooduba qol aannu dhawr Wasiir ku jirnay hurdeen markii rasaastu nagu bilaamantay, go'aanka ka-soo-bixidda waxa lahaa Madaxweynaha go'aan sax ah qaatay, waxa uu uga tudhay dadweynaha reer Laascaanood dhibaato dagaal iyo burbur. Md. Rayaale ma noqon sida xukuumadda Imbeghati oo dadkii Xamar deggenaa madfaca ku garaacay oo wax dhintay iyo wax qaxay ka dhigay.

Madaxweyne Rayaale damiirkiisu waa u oggolaan waayey inuu sidaa yeelo, qalbi ra'xiim ah ayuu leeyahay, inkasta oo arrintaas ay ku dhaliileen mucaaradku oo ay isku dayeen inay uga faa'iidaystaan ololaha doorashada.

Waxase dhacday in waqti dambe uu Madaxweynuhu go'aamiyey isaga oo aan golaha wasiirrada u sheegin, isla markaana aan kala tashan ciidan beeleedkii iyo booliskii Laascaanood ee maalintii la soo weeraray waxba ka celinwaayey iyo madaxdii kale ee gobolka ku magcaabnayd inuu mushaharkii iyo kharashkii kale xayiraad laga saaray muddo saddex bilood ah.

Markii dambena Laascaanood ayaa laga soo raray oo Caynabo ayaa la isugu keenay, taas waxay fursad u siisay inay Maamul-goboleedka Puntland qabsato magaalada Laascaanood oo ku soo dhiirato.

Maalintaas kadib uma suurtagelin madaxdii Gobalka Sool ee Somaliland ka tirsanayd inay Lascaanood ku noqodaan amma degaan, arrintaas mushahar ka joojintuna waxay iyagana ku dhacday ciidammadii iyo booliskii ka qornaa dhinaca degmooyinka Sanaag-Bari, inkasta oo aanay ku jirin xayiraadda Sool la saaray.

Arrintaas waxa iska fidsaday Wasiirkii Arrimaha Gudaha iyo Taliyahii Booliska, waxay sababtay in Saldhigga Booliska Badhan oo dhul weyn ka fadhiyey oo weligii ku jiri jiray gacanta askarta Somaliland u qoran oo xataa iska horimaadyo badani ka dhacay, ayaa markii seddex bilood mushahaaro la siin waayey ayey askartii u wareegeen Puntland oo mushaharkii siisay, sidaas ayaa saldhiggii gacanta u galay qolooyinka u ololeeynayey Maamul-goboleedka Puntland.

Xusuus Qorkii Gees
Geeridii Cigaal Kadib

Hawlihii Wasaaradda Arrimaha Dibedda



Siyaasiinta Somaliland waxay jecel yihiin inay qabtaan xilka Wasaaradda Arrimaha Dibedda, wax lala yaabo ma ahaa oo waxay kaga cararaan dayaca iyo baahidda yaalla dalka gudahiisa, habeennada dibedda joogaan oo ay ku dhaxaan huteellada waaweyn ee Hilton iyo Sheraton ayey ka nastaan dhibaatada oo Wasiirro u ekaadaan kuwooda xarfaanta ihi muddada iyo bixitaanka dibedda ay badsadaan, si ay waxooggaa dhigaal ah u soo samaystaan.

Haseyeeshee, Wasaaradda Arrimaha Dibedda waxay ka mid tahay wasaaradaha ugu shaqada liidata, meel qof xishoonayaa ka shaqeeyo ma aha; dal aan la aqoonsanayn oo aan lagu siinayn borotokool dawladeed iyo hab-maamuskii Wasiirnimo.

Safaaraddo shaqeeya oo la aqoonsan yahay oo kula shaqaynayaa aanay jirin, waxay ku haboonaan lahayd in la isku daro iyada iyo Wasaaradda Qorshaynta, siday mar ahaan jirtay oo loo bixiyo Wasaaradda Iskaaskiga Caalamiga, waayo-aragnimo ayaan ka hadlay.

Aniga oo labada Wasaaradoodba xilka Wasiirnimo ka soo qabtay, Wasaaradda Dib-u-dejintuna waxay ku fiicnayd inay Wasaaradda Arrimaha Gudaha qayb ka noqoto.

Muddadii 14 bilood ahayd ee aan hayey xilka Wasaaradda Arrimaha Dibedda, waxaan isku dayey bal inaan wax ku soo kordhiyo, waxa ii muuqatay inaan wax qoraal ah oo ka hadlaya qaddiyadda Somaliland iyo ictraaf-doonkeeda aannu jirin oo aan hore loo qaban, siday Soomaalidu u badan tahayna, waxay ahayd in la murmo oo arrinta Somaliland hadal ku koobnayd.

John Drysdale ayaa igu yidhi mar aan la sheekaystay Wasiir ka mid ahaa Wasiirradii badnaa ee soo maray xilka Wasaaradda Arrimaha Dibedda, waxa uu igu yidhi; '*Looma baahna qoraal ee hadal ayaa loo baahan yahay*.' Wasiir kalena waxa uu hadal-hays ka dhigtay, '*Waannu ku garaacnay, arrinta Somaliland madaxdii aan la soo kulmay*.**'**

Haddaba aniga oo macallin Jaamacadeed ahaan jiray, waxa iga dhaadhacsanayd in erayga daabacani uu madhax iyo xasuus ka tegayo, hadalkase la iska ilaawo, sidaas darteed Wasaaradihii Maaliyadda iyo Qorshayntaba ee aan xilkooda soo qabtay, waxan kaga tegay qoraallo, Wasaaradda Arrimaha Dibeddana waxaan diyaarinay Buugga ***Briefing Paper: The case For Somaliland's International Recognition as Independent State,*** anigoo la kaashnayna xafiiska London ee Somaliland iyo Matt Brydan oo ah khabiir reer Canada. Buuggaas oo noqday in ciddii wax ka qoraysa Somaliland ay marjac ka dhigatay la soo qaado.

Buuggan waxa uu ahaa in daabacaad labaad lagu sameeyo oo wixii qoraallo cusub ee la helo lagu daro, gaar ahaan nuqulladda tilmaamaya dawladihii ictiraafay Somaliland markii ay madaxbannaanida ka qaadatay Dawladdii Ingiriiska 26-dii bishii June sannadkii 1960.

Waxa Safiir David Shiin ku sheegay qoraal uu kaga hadlay Somaliland taar bogaadin ah oo uu soo diray Xoghayihii Arrimaha Dibedda waagaas ee Maraykanku oo uu ku bogaadinayo

Somaliland xorriyadeeda, haddii la raadsho meelo badan ayaa laga heli lahaa qaar la mid ah, waddamada ay ka mid yihiin Ghana, Geni, Masar, Hindiya, Indonesia, Jogoslafaakiya, dalalkaas oo waagaa u ololayn jiray xornimada dadka la gumaysto.

Somaliland waxa kaga baxa Wasaaradda Arrimaha Dibedda $400,000 (afar boqol oo kun oo dollar) sannadkii xafiisyo ay ku leedahay dalalka dibedda, balse xafiisyadaas waxa la ictiraafsan yahay oo ka sheeqeeya xafiiska Addis Ababa oo keliya, inta kale xafiisyaba ma laha rag ayaa iska qaata mushaharo oo lagu naas-nuujiyaa oo shaqo looga dhigaa, dawladaha ay la joogaan ma ictiraafsana wax madax ah ma arkaan marka laga reebo Prof. Iqbaal oo waddanka Koonfur Afrika (South Africa) jooga mooyaane.

Madaxweynaha waxaan kula taliyey inuu lacagta ka joojiyo dadkaas oo xafiiska Ethiopia la siiyo lacagta oo nin waayo-arag ah oo heer Wasiir ah la geeyo, isla markaana loo hagar-baxo, haddii sidaas la yeelo waxa uu ka mid noqon lahaa safaaradaha ugu awoodda badan ee Addis Ababa jooga.

Xafiiska Ethiopia waxa loo awoodi lahaa guryo waaweyn iyo xafiisyo, baabuur fiican, iyada oo Addis Ababa ka furan yihiin 89 safaaradood iyo xafiiska AU-da, halka maanta ka hawlgalaan shaqaale laba boqol qaata oo shaxaadaya cidda ay la kulmaan.

Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Ethiopia ayaa igu yidhi; '*Waar xafiiska soo maalgashada oo wax uu dadka ku dhexgalo soo siiya ninka aad meesha ku soo qorteen, dhinacayaga albaab kasta waan u furaynaa.'* Nasiib-darro, taladaas lama qaadan, aniguna waxaan ku war helay in nimankaas wakiillada isku sheega mid ka mid ihi igu yidhi; '*Waan maqlay inaad xafiiskayga xidhaysid waa inoo tahay*.' Ninkaas oo uu bilaabay aflagaado iyo dacaayad.

Waxa la heli kari lahaa in la adeegsado dad reer Somaliland amma ajnebi ah oo mu'tadawacnimo ku shaqeeya, haddaba qaar badan ayaa ku shaqeeya oo guulo waaweyn u soo hooyay Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Somaliland-ba, oo ciddina wax maalgelin ah siin shaqaalaha, gaar ahaan kuwa ka hawlgala xafiisyadii wakiillada Somaliland ee Djibouti, Yemen iyo Ethiopia, balse waxay qaadan jireen xoogaa gunno ah markay dibedda joogaan, marka la soo beddelo wax mushahaaro ah may lahayn.

Sidaas darteed, Madaxweynaha waxaan u soo gudbiyey iyo Wasiirka Maaliyadda in la siiyo mushahaar u dhiganta ka shaqaalaha Wasaaradda gudaheeda joogaa ay qaataan, dibedda markay joogaana ay gunnada qaataan, taas oo la iga aqbalay oo markii u horreysay hirgashay.

Waxa xusid mudan in la sheego in sidii aan hore uga soo sheekeeyay Wasaaradihii aan soo maray ugu sameeyey musqulaha, in aan tanna ugu sameeyey, waxa jirtay musqul xun oo aan qof xishoonayaa aannu geli karin, markii aan waydiiyey xagga la geeyo martida u timaaddaa, haddii ay u baahdaan musqul, waxay ii sheegeen sheeko xiiso lahayd oo ahayd in; '*Wefti Masaari ah ayaa mid ka mid ihi u baahday musqul, markii aan tusnay musqushii ayuu dibedda u soo booday markuu arkay, isaga oo awoodi kari waayey inuu isticmaalo*.'

Qorba-joogga Somaliland ayaa iyaga oo dedaal ka tahay keena dalka shirkado iyo shaqsiyaad doonaya inay maalgashadaan dalka, kuwaas oo dawladdu gacmo furan ku soo dhowaysaa, iyada oo uga dan leh inanay niyad-jebin shacabka dedaalayaa.

Heshiisyo ayaa lala galaa inta badani lagama midho dhaliyo, taas oo lagu canaanto dawladda, sidaas darteed waxa ii muuqatay baahidda dalka u qabo xafiis garyaqaan (Law Office) oo caalami ah oo dunida horumartay ka jira inay dawladdu qabsato oo qaddiyaddeeda iyo wixii heshiis ah ee lala gelayo dunida inteeda kale, isla markaana kala taliyo tubta loo marayo si sharci ah aqoonsi-raadinta ee aanay arrintu noqon muran oo maalinba hadal goonni ah aanay madaxdu ku kala hadlin isaga oo ka hubinaya, marka laga hadlayo arrinta ictiraafka Somaliland.

Garyaqaanadaas wax igu soo xidhay dad ajanebi ah oo daneeya aqoonsiga Somaliland, iyaga oo garyaqaanno u ahaa dawladda Nageria, ayaanu heshiiskii hore aannu kala saxeexanay, haseyeeshe cid dambe ma dabagelin.

Aqoonsi–raadinta Ictiraafka Somaliland

Hawsha ugu mudan ee ay qabato Wasaaradda Arrimaha Dibeddu amma laga filaa waa aqoonsi inay u raadiso Jamhuuriyadda Somaliland, Wasiirradii soo maray Wasaaradda ayaa khaati ka joogsaday joornaallada su'aasha ah, '*Aqoonsi ma sidaa marka ay garoonka ka soo degaan, mid ka mid ah oo safar dibaddeed ka soo laabtay ayaa bixiyey odhaah caan ah oo ahayd, haddii aad ii sheegtaan dukaan laga soo iibsado aqoonsiga waa soo iibin doonaa*.'

Waddamada Somaliland jaarka la ah iyaga lagama filayo ictiraaf, Ethiopia cilaaqaad wanaagsan ayaa innaga dhexeeya lagama filayo inay ina aqoonsato, waxa jirta in dawladda Maraykanku uga digtay 1991-kii markii Somaliland lagu dhawaaqay Ethiopia inaanay aqoonsan Somaliland, iyaga oo ka duulaya cadaawadii u dhexaysay Soomaaliya iyo Ethiopia awgeed.

Dawladaha kale iyana danahooda siyaasadeed ayaanay ku jirin aqoonsiga Somaliland, Djibouti mooyaane, Djibouti-na marna la islama jaan qaadin, siyaasad jacbur ah ayaa ka jirtay oo marna lala heshiinayo marna la coloobayo, taas oo jahawareer dhalisay.

Waxa na soo codsaday safiir hore oo Maraykan ah oo Ethiopia iyo Soomaaliyaba ka soo shaqeeyey, haddase Jaamacad waxa ka dhiga David Shiin, waxa uu ka bixiyey soo jeedin **Akaademiga Nabadda Horumarka (Academi for Peace and Development)**, uu kaga hadlayo arrinta Somaliland nuxurkiisu ahaa waddamada wax ka tari kara aqoonsiga Somaliland, kuwaas oo ku sheegay: Koonfurta Afrika (South Africa), Nageria, Senigaal, Algeria iyo Ethiopia.

Hoos: Wasiirka Arrimaha Dibedd dalka Senegal, Madaxweyne Rayaale, iyo Afhayeenka Madaxtooyada,
Kor: Axmed Yusuf Ducaale, Edna Aadan, Xoghayaha Madaxwaynaha iyo Maxamed Siciid Maxamed (Gees)

Arrintaas annaga oo ka duulayna, waxa waddanka Koonfur Afrika toos ula xidhiidhnay Wasiirka Arrimaha Dibedda oo gaadhsiinay in wixii uu soo gaadhsiiyo Prof. Iqbaal uu yahay wax ka soo baxay dawladda Somaliland, isagana waxaan u sameeyey miisaaniyad, baabuurna waa loo iibshay. Soo-jeedintaas oo Madaxweyne Rayaale iga aqbalay oo uu fuliyey, waxa dardar u hawlgalay Prof. Iqbaal, isaga oo aad uga shaqeeyey dhinaca bulshada rayidka ah iyo hay'adahoodu inay yimaaddaan Somaliand oo ay goob-joogayaal ka noqdaan doorashooyinkii ka dhacay dalka suxufiyiinta iyo madax ka socota jaamacadahooda, ayaa booqasho shaqo ku yimi dalka.

Prof. Iqbaal waxa uu ku guulaysanay Somaliland inay xidhiidh la samayno dalka Senegal oo ku yaalla galbeedka Afrika oo martiqaad rasmi ah u fidisay Madaxweyne Rayaale, halkaas oo wefdigiisu ku tegay, lana kulmay Wasiirrada Khaarajiga, Wasiirka Qoyska iyo Wasiirka Waxbarashada iyo Madaxweynaha Cabdale Waad ee dalkaas. Dhinaca Somaliland waxa ka socday wefti ka koobnaa Madaxweynaha iyo Wasiirrada Khaarajiga, Qoyska iyo Waxbarashada.

Dad ayaa ku doodda waddamada Nigeria iyo Senegal yaan loo tegin, waayo Nigeria Biyaafra ayaa isku dayday inay ka goosto oo dagaal ba'an ayaa ka dhacay, sidaas darteed yaan arrinta Somaliland lala soo qaadin ma jeclaysanayaan, Senegal-na gobol ayaa dagaal iyo muran siyaasadeed ka jiraa oo goosasho raba, iyana maxaa loogu tagay? Waxa loogu tegayaa in loo

sheego in qaddiyadda Somaliland ka duwan tahay kuwaas oo Somaliland ahayd mustamaraddii Ingiriis, isla markaana oo ka goonni ahayd Soomaaliya oo ahayd mustacmarad Talyaani ah, mid walibana goonideeda xorriyad u qaadatay, xuduud gaar ahna la kala lahaa, halka Gobolka Biyafra uu ka mid ahaa weligii Nigeria oo aan gaar ahaan weligii u jirin, sidoo kale Gobalka Kasmaas uu weligii ka mid ahaa dalka Senegal.
Dad ayaa qaba in lala dhuunto oo aan loo tegin oo laga dhaadhicin qaddiyadda Somaliland dalalkaas waaweyn ee Afrika iyo AU-da wax ka ah, haddii aanay ku taageerin in aanay kaa hor iman ayaa la isku dayey.
Si kastaba ha ahaatee, muruq laba suule' ninba si ku ah, waxaan ku soo ogaanay sodcaalka Senegal in ictiraafka Somaliland aannu ku xidhnayn muran iyo xaq (rights) ee ku xidhan yahay danaysi iyo masaalix, **(Recognition is declaratory),** waa wax ciddi maslaxadii ugu jirtaa ay ku dhawaaqdo danteeda awgeed, fiiri waddamada badhtamaha Aasiya, dalalkii ka go'ay Yuguslaaviya, midna weligeed ma ahayn wadamo jira, haddana waa la ictiraafay. Bal eeg Jamhuuriyadda Saxaaraha Galbeed ee AU-du ictiraafsan tahay ee safaaradda ku leh Ethiopia ee aan dal xukumin ee kursiga ku leh Ururka AU-da.
Madaxweyne Rayaale wuxuu og yahay meesha uu u marayo ictiraafka Somaliland iyo waxay ku xidhan tahay haddii ciddi weydiiso. Waxa uu ku xidhan yahay aan war sheekoodee waa LACAG!! LACAG! Haddii uu hayn lahaa lacag dhawr waddan ayuu hayn lahaa ictiraafkooda oo la iibsan lahaa. Afar Milyan oo dollar ayaa lagu xidhay ictiraafka.

Wasiirro Xilkii Laga Qaaday

Madaxweyne Rayaale dawladdii uu ka dhaxlay Madaxweynihii geeriyooday Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal sideedii ayuu u daayey markii hore, haseyeeshee waxa uu bilaabay inuu beddelo Wasiirro dhawr ah, waxa uu ku bilaabay Wasiirradda aan Isaaqa ahayn, isaga oo xilkii ka qaaday Wasiirradii Caddaaladda, Ciyaaraha iyo Qorshaynta oo ahaa xubno ka soo jeeda beelaha aan Isaaq ahayn.
Intaa kadib, Madaxweyne Rayaale waxa uu beddelay Wasiirkii Arrimaha Gudaha Marxuun Cabdillaahi Cadde oo u ku beddelay Ismaciil Aadan Cismaan, waxa ku xigay Wasiirkii Hawlaha Guud Eng. Caynab oo ahaa Wasiir aqoon leh oo hufan, isla markaana hawshiisa ka adag oo ixtiraam badan ku lahaa hay'adaha deeqda bixiya iyo Wasiirro kale oo ay ka mid yihiin Wasiirkii Gaashandhigga iyo Biyaha & Macdanta, waxase ugu sanqadh weyneyd tii dhinaca siyaasadda xil-ka-xayuubintii Wasiirkii Waxbarashada Mudane Axmed Yuusuf Ducaale.
Arrintaas dhawr jeer ayaan Madaxweynaha kala hadlay oo aan is lahaa way dhammaatay, maalin waxa igu weheliyey Cabdiraxmaan Ducaale, waxse kama tarin, Axmed Yuusuf Ducaale-na waxa uu ii sheegay in toddoba casho ka hor inta aan xilka laga qaadin uu Madaxweynaha habeenimo is-arkeen oo is-calool xaadheen oo ay heshiiyeen, waxa is-qabadku ku sal lahaa arrin soo

noqnoqta oo ka soo jeedda hab-beeleedkii lagu soo kabkabay nidaamka dawladnimo ee Somaliland oo marwalba muran iyo is-qabad ka dhex abuurta madaxda.
Wasiirka Arrimaha Gudaha ayaa uga mas'uul ah xukuumadda maamulka goballada iyo degmooyinka, haseyeeshee Wasiirka degmada ka soo jeeda ayaa ku haysta oo siyaasad ka dhigta in ciddii dawladda u magacaabayso uu isagu magacaabayo. Waxaad mooddaa in hab-beeleedkii innaga dhigay Madaxweynayaal beeleed oo wadaaga xukun Fedaraal ah oo nin waliba ka wakiil yahay degmadiisa.
La yaab ma laha Wasiirradu haddii ay sidaas u dhaqmaan isaga ayaa loo dirayaa degmadiisa, haddii wax looga baahdo oo Wasiirkii shaqada ku lahaa ma tegayo, sidaas darteed waxa uu u arkaa inuu xaq u leeyahay magcaabidda ciddii ka hawlgelaysa degmadiisa uu ka soo jeedo.
Haddaba mar haddii Axmed Yuusuf Ducaale uu ka mid ahaa xubin Golaha Dhexe ee UDUB, isla markaaana ka mid ahaa siyaasiyiintii, waxa uu soo magcaabay xubnihii doorashada degaannada uga qaybgeli lahaa xisbigga UDUB Degmada Gabilay oo uu ka soo jeeday, lagana soo doortay sannadkii1964, halka uu 1960-kiina uu iska-sharraxay, haseyeeshee lagaga guulaystay doorashadii.
Wasiirkii Arrimaha Gudaha Ismaaciil Aadan Cismaan ayaa liis kale ka daba geeyey liiskii hore oo u geeyey Guddigii Doorashooyinka Qaranka Axmed Yuusuf Ducaale, Guddigii waxay aqbaleen liiskii hore ee Axmed Yuusuf uu taageersanaa, kii Ismaaiil Aadan oo dabcan Madaxweynuhu raaliga ka ahaa way diideen, iyaga oo ku sababeeyey in muddadii wax-ka-beddelka liisaska murrashaxiinta xisbiyadu soo qadimeen ee la oggolaa ay dhammaatay oo aan la qabanayn dalab dambe.
Haddaba muddadii muranku socday ayaa xubno ka mid ah liiskii Axmed Yuusuf Ducaale watay ayaa ka aflagaadeeyey Tv-ga Madaxweyne Rayaale, nimankaas mid ka mid ah ayaa Axmed Yuusuf u olaleeyey si uu noqdo Maayarka magaalada Gabilay, arrintaasna oo Madaxweyne Rayaale raali ka ahayn, mar aan ku la taliyey Madaxweyne Rayaale inuu soo celiyo Axmed Yuusuf Ducaale, waxa uu iigu jawaabay; '*Ma ninka raggii Tv-ga iga aflagaadeeyey watay ee soo saaray ayaan soo ceshaa?*' Waxa isu kay qabanweyday arrin kale oo aan ka maqlay Madaxweynaha iyo jawaabtan.
Booqashadii Djibouti ayaa markii aan la fadhiisanay Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle ayaa waxa uu fayl ka soo saaray Geelle warqad internet-ka laga soo saaray oo ah wargeyska Haatuf ay ku qoran tahay weedh nuxurkeedu ahaa, '*Boqashada Rayaale ee Djibouti waa khiyaamo qaran Madaxweyne Rayaale*.' Madaxweyne Rayaale iyada oo wefdigii wada fadhiyo ayuu yidhi; '*Waa waxayagii sidaas ayaanu isugula hadalnaa*.'
Haddaba halkaas waxa uu ku caddeeyey dulqaad iyo habka siyaasadda ee Somaliland, markaa waxa uu hibanaayey aflagaadadii xubnihii Tv-ga ka hadlay, waxa ayaan-darro ahayd Axmed Yuusuf si gaar ah ugu dedaalay xisbiga UDUB, kana shaqaynayey inuu ku guulaysto xisbigu doorashada ayay ku keliftay inuu toos ugu biiro xisbigii mucaaradka ahaa ee KULMIYE, halkaas oo Degmadii Gabilay ee doorashadii hore u codaysay UDUB ay markan u leexatay dhinaca KULMIYE oo siisay aqlibiyad weyn, taas oo uu ku sigtay Madaxwyne Rayaale in lagaga guulaysto doorashadii madaxtooyada. Waxa layaab leh arrinka ku keliftay xil-ka-qaadidaas xilli waqti yari ka hadhsanayd codayntii doorashada **"***Faraskaaga laguma beddelo adoo ka tallaabayo biyo soconaya***."**

Cadde Muuse oo soo Irkaday Somaliland

Macallin Jirde ayaa markii 1971 askartii dalka qabsatay ay ku shubtay wixii macallin ahaa xeradii tababarka askarta ee Bootiko (Xallane), waxa uu arkay saraakiil ardaydiisii ahayd oo aan wax xushmad ah iyo abaal ah aan u hayn oo uu ka filayey, oo tiriyey markaas gabay aan tuducan ka soo qaatay;

Tamaashiirta oo aan eersado
Iyo tu aan la eegayn dheh
Soomaali wixi aan u taray
Tacab khasaare uun dheh

Macallin Jirde Ilaahay ha u naxariisto, haddii uu nool yahay iyo haddii uu dhintayba.

Siyaasiin badan oo reer Soomaaliya ah ayaa markay meel ay miciinsadaan waayeen u soo irkaday Somaliland xilligii Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal iyo Madaxweyne Rayaale-ba, iyaga oo caado u noqotay si kasta oo loo soo dhoweeyo in haddana marka ay xil ka qabtaan Soomaaliya inay abaalkii Somaliland iyo dadkeeda hilmaamaan.

Haddaba Madaxweynaha maamul-goboleedka Puntland Cadde Muuse waxa uu ka mid ahaa qolooyinkaas miiciinka soo biday Somaliland, marka arrintii jiq ku tidhi waxa uu Hargeysa soo gaadhay dabyaaqadii bishii November oo uu ku soo degay Iid Hutel ee Biriijka Hargeysa ku agyaal, halkaas ayuu ka kiraystay laba gaadhi Land Cruiser oo ay leeyihiin dad ka soo jeeda beesha galbeedka Burco oo dal aqoon ah, waxay geeyeen xadka u dhexeeya maamul-goboleedka Puntland iyo Somaliland oo ay ku sugayeen gaadiid iyo ciidan ardaagiisa ah Cismaan Maxamuud ah, kuwaas ayaa u gelbiyey ilaa Dhuudo. Labadii baabuur ee uu kiraystay waxay kaga soo noqdeen xadka markay gaadhsiiyeen ciidankiisii sidii ballantu ahayd.

Arrintii Lascaanood kadib iyo doorashadii Golayaasha Degaanka ee Somaliland waxa ka dhacay jiidda Qardho iyo Dhuudo dagaallo ay isaga horyimaaddeen ciidamo ku kacsan Cabdillaahi Yuusuf oo markaas xukuma maamul-goboleedka Puntland oo uu hoggaaminayo Cadde Muuse iyo kuwii maamulka Puntland.

Waxa lagaga adkaaday ciidammadii Cadde Muuse firxadkoodii oo uu hoggaaminayo Cadde ayaa soo galay Somaliland, iyaga oo soo dhaafeen carra Wersangeli iyo Dhulbahanteba meelaha uu hadda ku doodo oo sheegto waa isku aamini waayeen. Waxay nafta ku aamineen xera Isaaq Degmada Ceel-afwayn meel magaalada u dhow, halkaas uu u dejiyeyey Boqor Buurmadow.

War uma hayo inuu la soo xidhiidhay Madaxweynaha iyo in kale, haseyeeshee arrintaas Cadde Muuse marna laguma soo qaadin Golaha Wasiirradda dhexdiisa sidii arrintii Laascaanood oo kale.

Waxa loo oggolaaday kooxdii Cadde Muuse inay kala soo degaan Dekadda Berbera baabuuro tiraba saddex inta aan ka war helay oo dawladdu siisay cashuur-dhaaf, joogitaanka ciidammada Cadde Muuse ee Gobalka Sanaag, waxay ku abuurtay nabadgelyo-darro goballada bari, Togdheer, Sool iyo dabcan Sanaag.

Ciidammada Cabdilaahi Yuusuf u daacadda ah oo daba-jooga Cadde Muuse ayaa galaabixi jiray degaankaas bari, taas waxay keentay in hay'adaha samafalku ay ka maageen gobollada bari oo hawlahoodii hakiyeen.

Guddigii Doorashooyinka oo u diyaar garoobay doorashadii Madaxweynaha, iyagana waxa ku adkaatay sidii codayni uga dhici lahayd jiidaas, arrintaas waxay ka sii dartay markii Ethiopia dhawr goor nagala soo xidhiidhtay joogitaanka ciidammada Cadde Muuse ee Somaliland.

Axsaabta mucaardka ah iyo saxaafadduba aad ayey uga hadleen, haseyeeshee may jirin siyaasad xukuumaddu ka leedahay arrintaas, haddii ay jirtayna ma ahayn mid laga wadahadlay ee waxay ahayd mid ku kooban Madaxweyne Rayaale.

Marar aan Madaxweynaha arrintaas kala hadlay waxa uu igu yidhi; '*Dhaqso ayuu inoo dhaafayaa, alaabo ayaan meel ka sugaynaa*.' Nasiib-wanaag doorashadii Madaxweynaha oo

ahayd inay dhacdo bishii January 2002 sida distuurka dalku dhigayo codsi ka yimi Guddiga Doorashooyinka Qaranka ayaa Guurtidu u kordhisay xilkii Madaxweynaha ilaa bisha May 2002 si doorashada loo qabto bil ka hor amma bisha April 2002.

Waxa markaas muuqatay in waqti loo helo sidii ciidammadan Cadde Muuse la isaga furdaamin lahaa si doorashadu u qabsoonto, si kastaba ha ka ahaatee waxa arrintan hirgeliyey Boqor Buurmadow isaga oo la kaashaday oo soo geliyey arrinta Suldaan Siciid Cabdisalaan, waxa uu kalsooni ka soo helay labadii nin ee is-hayey Cadde Muuse iyo Cabdillaahi Yuusuf, dabadeedna waxa uu u soo gudbay Hargeysa oo uu kula kulmay Madaxweyne Rayaale, xogogaal uma ihi waxay isla garteen, waxaanse u malaynayaa inaan la isku afgaran waanwaanta uu Boqor Buurmadow ka dhexwaday labadaa nin'e Majeerteen.

Waxa arrintan u marag ah Hargeysa waxa yimi Suldaan Siciid Cabdisalaan oo uu Boqor Buurmadow u yeedhay, markii aan Suldaanka ka warsaday arrinta keentay waxa uu ii sheegay inuu Madaxweynaha ka hubiyo, waxa uu ka qabo waan-waanta aan wadno iyo inuu isagu wax xal ah uu u hayo, isla markaana uu u sheego dhibaatada iyo nabadgelyo-xumida joogitaanka ciidammadaas ku abuurtay Gobalka Sanaag.

Haddaba markii uu la kulmay Suldaanku Madaxweynaha waxa uu ii sheegay in aannu Madaxweynuhu ka raalli ahayn waan-waanta ay wadaan Suldaanka iyo Boqorku. Suldaankii waxa uu ku laabtay Sanaag iyo gurigiisii, waxase Hargeysa ku sii negaa Boqor Buur-madow, iyada oo xaajadu halkas marayso oo dawladda Ethiopia noo muujisay werwerka ay ka qabto joogitaanka Cadde Muuse iyo ciidankiisa ee Somaliland, iyagoo markaas u arkeyey inay wada socdaan Jaamac Cali Jaamac oo Cabdillaahi Yuusuf ka saaray maamul-goboleedka Puntland, kana qaaday Madaxweynenimadii, dabadeed iska xaadiriyey dawladdii Carta lagu dhisay ee Cabdiqaasim Salaad Xasan uu Madaxweynaha ka ahaa, iyada oo lagu eedaynayey inay xidhiidh la leedahay wadaado Al-itixaad ah.

Wakiil Ethiopia u fadhiya Somaliland Abdette Dirirbasa ayaa ila soo xidhiidhay, waxa uu ii sheegay in Guddoomiyaha xisbiga KULMIYE Mudane Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) uu codsaday inuu tego Addis Ababa si uu la kulmo madaxda Ethiopia, waxa uu i weydiiyey waxa uu xukuumaddu ka qabto arrintaas. Waxaan kula taliyey si Ethiopia ay ugu muuqato inay dhexdhexaad ka tahay arrinta doorashada Madaxweynaha Somaliland, waxa habboon in wafdi Ethiopian ahi Hargeysa yimaaddo oo uu halkan ku wada arko madaxda tartamaysa sidaas ayey ku dhammaatay arrintii.

Waxa Hargeysa yimi Wasiira-dawlaha Arrimaha Dibadda ee Dawladda Ethiopia Dr. Takade iyo Janaraal Nabadgelyada qabilsan, waftigii waxay la kulmeen Madaxweyne Rayaale, Aniga oo goob-joog ah, waxay si adag noogu sheegeen inaanay ka raalli ahayn ciidammada Cadde Muuse ee Somaliland martigelisay oo degdeg arrintaas wax uga qabato.

Sidoo kale ayaa wafdigu arkay madaxdii axsaabta kale, haddaba waxaan ugu tegay Wasiirka Ethiopia Hutel Maansoor ee uu ku jiray, waxaan u sheegay inay arrintu adag tahay cid magangelyo soo doonatay inaan lagu celin karin, meeshii ay ka soo qaxday ilaa heshiis laga dhexdhaliyo kooxihii is-hayey.

Haddaba sidii caadada noo ahayd haddii aan reer Somaliland aynu nahay waxa arrintan galay laba madax-dhaqameed oo reer Sanaag oo heshiis ka dhexdhalinaya labada docood, waxa idinku dhiniciina kala hadashaan Cabdillaahi Yuusuf si uu ugu hoggaansanaado wixii go'aan ah ee ay gaadhaan salaadiintu. Waxaan tusay oo nuqul ka siiyey laba qoraal oo Cadde Muuse iyo Cabdillaahi Yuusuf oo ay soo qoreen Boqor Buur-madow iyo Suldaan Siciid Cabdisalaan oo ku cadeeyeen inay raali ka yihiin dhexdhexaadinta labada madax-dhaqameed. Qoraaladaas oo afka Soomaaliga ku qornaa waa uu qaatay Wasiirku, markuu Addis Ababa ku noqday ayaa Cabdillaahi Yuusuf diyaarad loo diray oo Addis Ababa la keenay, laguna wargeliyey inuu oggolaado heshiisiinta odayaashu wadaan oo adkeeyey. Hal habeen ayaa ciidammadii Cadde

Muuse iyaga oo ay la socdaan labadii madax-dhaqmeed ay galeen magaalada Boosaaso si nabadgelyo ah, taas oo soo afjartay colaad ka taagnayd bari.

Guddigii Doorashooyinka waxa u suurtagashay inay doorashadii ka qabtaan Sanaag oo sidaasi ayey ku dhacday doorashadii Madaxweynuhu, tallaabadii labaad ee dimuqraadiyaynta Somaliland ayaa hirgashay. Libtaas ayaa u soo hoyatay Somaliland oo aan doorasho dhacdeen haddii ciidammada Cadde Muuse sii joogi lahaayeen oo dagaallo ka dhici lahaayeen jiidaas.

Xummaddii Doorashada Madaxtooyada

Doorashadii Golayaasha Deegaanka kadib markii la xaqiiyey in saddexda xisbi ee ka qaybgalaya doorashada aqalka madaxtooyada inay ka qaybgalayaan xisbiyada kala ah; UDUB, UCID iyo KULMIYE.

Haddaba, waxa bilaabantay xummaddii doorashada Madaxweynaha saddex urur ee dhacay ayaa taageerayaashoodii loogu kala tartamay oo saddexdii soo baxay ay ku beratameen inay ku kala guulaystaan waa la kala qaybsaday, waxa aan ka qaybgalay wadahadalkii dhexmaray ururkii ASAD iyo xisbiga UDUB, waxa ASAD uu ahaa xisbi ay asaasayaashiisu ka soo jeedaan Jabhaddii SNM.

Haddaba mar haddii xisbiga mucaaradka ee tartanka UDUB kula jire ee KULMIYE uu isna yahay xisbi ka soo jeeda jabhadii SNM, waxa xoogga la saaray in xisbiga ASAD uu ku soo biiro UDUB. Waxa shirku ka dhacay madaxtooyada oo fadhi ahaa dhinaca UDUB waxa ka mid ahaa; Madxaweynaha Rayaale iyo Madaxweyen-ku-xigeenkiisa Axmed Yuusuf, Xoghayaha xisbiga UDUB Maxamed Ismaaciil Bullaale, Axmed Oomane, Cabdillaahi Darewal iyo Aniga [Maxamed Siciid Gees], dhinaca ASAD waxa maalintii hore ka mid ahaa, Saleebaan Maxamuud Aadan (Saleebaan-Gaal), Cabdiraxmaan Aw Cali, Marxuumkii Quule iyo qolooyin kale oo aanan hadda xusuusnayn.

Maalintii labaad Waxa qoladii ASAD ka maqnaa Cabdiraxmaan Aw Cali oo mar dambe oo aan arkay ii sheegay inuu KULMIYE ku biiray oo ay sidaas ku qurux badan tahay inaan ana raaco Siilaanyo, Saleebaan Gaal-na uu Rayaale raaco, haddii kale weji qabiil ayey yeelanaysaa, arrintaas waan ku bogaadiyey, guud ahaan ururkii ASAD waxa u xoog batay KULMIYE xayn Saleebaan la socotay mooyaane, haseyeeshee qayb weyn ayey xukuumaddii ka qaateen.

Waxa Madaxweyne Daahir Rayaale Kaahin laga dhaadiciyey inuu Axmed Yuusuf Ducaale uu kula loollamayo murrashaxnimada Madaxweynaha ee xisbiga UDUB.

Haseyeeshee, waxba kama jirin arrintaas oo aniga ayuu Axmed Yuusuf iga diiday in la isla sharraxo Rayaale xisbiga dhexdiisa mar hore oo aan la soo qaaday arintaas, sidaas darteed markii uu Madaxweyne Rayaale ila soo qaaday werwerka uu arrintaas ka qabo, waxan u sheegay inaanay waxba ka jirinoo uu inta wefdiga aniga iyo Axmed Yusuf uu Galbeedka Afrika ku maqan nahay uu qabsado shirweynaha xisbiga oo ka soo baxo, sidaas ayuu yeelay oo ku noqday murashaxa xisbiga UDUB ee tartanka doorashada Madaxweynaha.

Siday u dhacdayba waxa haya'daha ka hawlgala ee caalamiga ah iyo kuwa Jimciyadda Quruumuhu ka socdaa waxay filayeen in xisbiga KULMIYE ku adkaan doono doorashada oo aanay qarsan jirin, sidoo kale waxa wakiilka Ethiopia u fadhiya Hargeysa uu isaguna qabay fikrad taas la mid ah.

Haddaba maalin ayaa waxa ballan ku yeeshay Hutel Ambaasadoor Mudane Axmed Siilaanyo, wakiilka Ethiopia iyo Dahabshiil kulanka, kadib waxa Siilaanyo soo raacay baabuurkii wakiilka Itoobiya Mudane Abdete Diridbasa, warkaas ayaa Madaxweyne Rayaale loo soo sheegay, taas oo uu aannu jeclaysan, degdeg ayuu iigu yeedhay.

Dabadeed, waxa uu yidhi; '*Waxaan codsanayaa in la iga beddelo,*' waxan ku qanciyey inuu horta arko sidaas ayaan ballan uga soo qabtay kulankii, Madaxweyne iyo wakiilkii Ethiopia ayaa wadahadlay si deggan ayaa wakiilkii u sheegay inuu xaq u leeyahay inuu si cad ula kulmi karo madaxda xisbiyada mucaaridka ah ee sharciga ah ee xukuumadda Somaliland aqoonsan tahay, waxase uu qiray inuu baabuurkiisa magaalada ku soo dhexmariyo ay baratoolka dhaafsanayd oo loo qaadan karo in Itoobiyo ay KULMIYE raacsan tahay.

Madaxweyne Rayaale oo laga yaabo xoog aanan ogayn inuu ogaa ayaa si cadho ku jirto ku yidhi isaga oo la hadlaya wakiilka Itoobiya; *'Adigu saw ma tihid Oromo, haddana Meles Sinaawi oo Tigree ah ayaa Itoobiya xukuma oo idin xukuma maxaad igu diidan tahay inaan aniguna Madaxweyne ka noqdo Somaliland.'*

Arrintii waxay noqotay af-kala qaad wakiilkii waxa uu ku adkaystay inaanay Ethiopia ay isugu mid yihiin xisbiyada tartamayaa oo aanay cidna gaar ahaan ula socon, markii aan ka baxnay Madaxtooyada ayaan ka baryey wakiilkii inaannu weedhaa u gudbin madaxdiisa Addis Ababa fadhida, taas oo keeni karta in xidhiidhka Somaliland iyo Ethiopia uu xumaado.

Waxa uu iigu jawaabay inuu gudbinayo warkaas mar haddii uu ka soo baxay afkii Madaxweynaha ma qarin karo; waxa iigu xigtay inuu ii sheegay mudda yar kadib in laga fekarayo in Itoobiya ay xidho xafiiska ay ku leedahay Somaliland ma hubo inay dhab ahayd iyo inuu ku hanjebayey. Madaxweyne Rayaale waxa uu ii sheegay inuu codsan doono in laga beddelo Wakiilkaas, arrinta waxa hurinayey nin Tigree ah oo sirdoonka Ethiopia ahaa oo Hargeysa joogay; kii oo degdeg loo beddelay, Wakiilkiina waa la dalacsiiyey oo jago weyn ayuu qabtay oo weli arrimaha Soomaalida ayuu gacanta ku hayaa.

Wasiirradii Sanaadiiqda

Waxa uu Madaxweynuhu madax iiga dhigay guddi Wasiirro ah oo u qaabilsan doorashada, waxaannu xarun ka dhiganay Idaacadda Hargeysa, waayo waxa xubin ka ahaa guddiga Cabdillaahi Maxamed Ducaale, oo noo fidiyey martiqaadka, iyada oo ay ahayd meel had iyo jeer laga shaqaynayo oo cidi joogto goor walba toddobadii cashoba mar ayaanu Madaxweynaha talo ka siin jirnay, waxa loo baahan yahay in la qabto ololaha doorashada waxa ka mid ahaa talooyinkaas magacaabidii Wasiira-dawlayaalka, taas oo wax badan ka tartay xaggii codaynta doorashada dhinaca UDUB Wasiirradaas oo loo bixiyey "***Wasiirradii Sanaadiiqda***" waxase dhacday in goballadii loo kala baxay, dabeeto guddigii uu sidaa ku burburay oo la isugu iman waayey.

Maalin ayaa aan la fadhiisanay Madaxweynaha aniga iyo Wasiir kale oo beesha ah iyo nin madax-dhaqameed ah oo isla beesha ah salaadii casar oo loo kacay ayaan ka hadhay safkii jamaca. Wasiirkii kale ayaa yidhi; *'Soo gal safka.'* Markaas ayuu Madaxweyne Rayaale yidhi; '*Dhowaantan ma tukado Gees ee iska da'aa.*' Maalintaas kadib kama qaybgelin olalahii doorashada, waxaan isku koobay sidii aan ula xidhiidhi lahaa goob-joogayaashii iyo soo-dhoweyntooda dhinaca garoonka diyaaradaha iyo fiisayaashooda si aan loo qashqashin oo habsami loo qaabilo dadkaas ka marag-kacaya doorashada.

Weedha Madaxweynaha ayaa wax badan ii sheegtay waxa ii soo baxday in raggii wax sheegi jiray ay cajalad iga duubeen oo warar la siiyey Madaxweynaha oo kalsoonidii hore jirin, sidaas darteed afkayga ayaan xidhay, waanna ka gaabsaday hawlihii socday aniga soo arkay sidii Axmed Yuusuf Ducaale loo khaarajiyey, isagoo aan marna diyaar u ahayn inuu taageero mooyaane inuu wax ka xumeeyo.

Waxa aan u taagnaa Axmed Yuusuf isaga oo Madaxweyne Rayaale hortiisa ugu dhaartay inuu isaga taageerayo, siyaasadda waxa tiir u ah is-aaminaad iyo kalsooni haddii ay meesha ka baxdo ma jirto wada shaqayni. Waan ka talogalay amma ka talobixiyey kooxdii madaxda ahayd ee loo diray dhinaca beesha aan ka soo jeedo, haseyeeshee anigu kama qaybgelin.

Madaxweynaha ayaa yidhi; *'Geesow halkan ayaan uga baahannahay.'* Waxa aan ka dhiibtay codkaygii Guriga Shaqaaalaha, waxa aan ka mid ahaa dadkii ugu horreeyey, halkaas oo aan kula kulmay warfidiyeenadii caalamiga ahaa iyo goob-joogayaashii.

Markii natiijadii doorashadu hore u loogu dhawaaqi waayey cilado farsamo awgeed, waxa batay wararkii kutiri-kuteenta ahaa. Galab aniga oo guriga keligay fadhiya, ayaa waxa iigu yimi Guddoomiyihii Maxkamadda Sare Mudane Siciid Farax Dhabooke (**Gacamay**). Ninkaas oo aan anigu Hargeysa keenay shaqadana la raadshay, haseyeeshee aan waqtigan i jeclayn oo iga kabaweynaaday, waxa uu igu yidhi; *'Waxa i wareershay dacwadihii xisbiyada ee doorashada.'* waxan ku idhi oo weli natiijadii laguma dhawaaqin ee maxay ka dacwoonayaan, waxa uu yidhi; *'Haddana dacwado ayaa yaalla maxkamadda.'*

Waxan xasuustay eray uu igu yidhi dareewalkaygu Cabdi Madoobe oo ahaan jiray mujaahidiintii, oo qolada Arab ee aannu gacalka nahay ahaa isaga oo ila kaftamaya; *'Geesow Guddigii Doorashooyinka iyo Maxkamadii Sare-ba idinka (Warsangeli) ayaa jooga ee ha isku kaayo dilina.'* Waxan ku idhi, Gacamay waar wax baa la kabkabayaa ee natiijadda uu ku dhawaaqo Komishanku sideeda ku ansixi oo ha innagu furfuran, lagama dabaalan karo muranka Soomaaliyeed oo maadaama uu Komishanka uu u madax yahay nin beesha ihi haddii aad laba war oo kala jaad ah soo kala saartaan, waxa rumoomaya way isku kaaya dilayaan. Sidaas ayey u dhacday markii natiijadii soo baxday, ma garan karo waxa uu yeeli lahaa haddii natiijadu ay ahaan lahayd mid xisbiga KULMIYE ee mucaaradka ihi uu ku guulaysto.

Gelinkii dambe ee Jimcaha ayaa waxa magaalada laga maqlay sawaxan iyo dabaal-deg ay samaynayaan taageerayaashii xisbiga KULMIYE, iyaga oo leh waa aan guulaysanay, haddaba fiidkii mar ay saacaddu tahay abaara 7-dii ayaan telefoon kula hadlay Maxamuud Garaad

Maxamed (Qaw) oo ahaa xubin Komishanka Doorashooyinka ka mid ah, waxa uu ii sheegay inuu i soo marayo mar haddaan keligay ahay, waannu kaga dhabeeyey oo ii yimi.
Markii uu ii yimi Maxamuud Garaad wuu ii warramay oo waxa uu igu yidhi; '*Aniga sida aan u xisaabiyey waa la idinka guulaystay, oo KULMIYE ayaa idin dheer 280 cod*.' Isaga oo weli ila jooga ayaa waxa ku soo dhacay telifoon, cabbaar kadib waxa noo yimi Xildhibaan Dhulbahante ah oo lagu magacaabo Dhakool, waxa uu noo sheegay inuu soo maray Madaxtooyadii oo Madaxweynihii keligii fadhiyo, waxa uu ii sheegay inuu dhawr jeer isku da'yey telifoonkii Cadami oo la iga qabanwaayey.
Haddaba Garaad ina keen aan Madaxweynaha u tagnee, ninkii kale ee Harti ayaa la hadli waayey, waxa uu yidhi Qaw, '*Waar habeen Komishanku tago madaxtooyada maaha ee i daa*.' Waxaan ku biirriyay orod oo u tag oo u sheeg wixii ay kula tahay ee aan wax kuu dhimayn, sidaas ayey igaga tageen.
Aniga iima kala duwanayn ciddii heshaa, waayo waxaan ogaa inaanan xukuumadda la dhisi doono midna ka mid noqonayn, balse waxa ii darnaa in si nabadgelyo ah ku dhammaato oo aan la isku qabqabsan.
Markaas 12 sanno ayaan ku jiray siyaasadda Somaaliland oo lixdii u dambeysay aan dhexda u fadhiyey talladda dalka, waxase ii muuqatay hadda in waqtigaas soo dhammaaday, oo aan si qurux badan uga baxo saaxadda siyaasadda tooska ah ayaan goostay.
Subaxdii waxan tegay xafiiskii Wasaaradda, waxa aan u sheegay Agaasimihii Guud, Cabdi Aadan iyo Xoghayntii Yuusuf inay diyaariyaan xil-wareejin, mar haddii maanta lagu dhawaaqayo natiijadii, intaas markii aan u sheegay kadib waxan tegay Madaxtooyadii xafiiskii Madaxweyne-ku-xigeenka oo ay dhawr Wasiir fadhiyaan oo aan ka xusuusto Edna Aadan Dhakhtar, Axmed Yuusuf Yaasiin ayaan doonay inaan la faqo, dabadeed Wasiirradii waa naga baxeen, waxa aan u sheegay warkii Garaad ii sheegay, waxaan ku idhi haddii sidaas tahay oo aanay wax isbeddelin, si nabadgelyo ah ha loogu tiriyo nimankan kulul ee jabhadda ahaa, waxan ku daray innaga ayaa iska badinay, markii aan Axmed Yuusuf Ducaale erinay waa taas Gabilay innaga leexatay, waxa uu yidhi; '*Waa run oo waan kala hadlay arrintaas Madaxweynaha, waa taas natiijadii*." Sidaas ayaan kaga tegay oo gurigaygii iska qabtay. Haddii KULMIYE helo shaqo kuma lihi haddii UDUB helna kuma jiro dawladda dambe ee Rayaale.
Waxa deggan Waqooyiga Ameerika, Canada iyo Maraykan, Aabbe, Hooyo iyo lix walaaladey ah iyo carruurtoodii oo qaarkood carruuro sii leeyihiin oo aanan qaar arag, kuwa kalena muddo dheer isugu kaayo dambeysay.
Haddaba waxa xafiiska maalin dambe oo la sheegay natiijadii oo lagu dhawaaqay in UDUB ku guulaystay, igu soo maray nin ka socda safaaradda Maraykanka ee Nairobi oo aan muddo badan iqiin, markaan cabbaar sheekaysanay ayaan u sheegay inaan rabo inaan booqdo Maraykan, waxa uu igu yidhi; '*Baasaboorka u soo dhiib nin Soomaali ah oo la socday*.' Sidaas ayaan yeelay, sidii uu iigu ballanqaaday waxa la ii soo diray baasaboorkaygii oo fiisihii Maraykanku ku yaal, waxa ii keenay Yasiin Kiilo.
Waxa uu ii yimi sidii aan filayey aniga oo xukuumaddii cusbayd ee Madaxwayne Rayaale dibadda ka jooga, ayaamahii muranka natiijadu taagnayd ee arrintu Maxkamadda Sare ku jirtay ayaan Madaxweyne Rayaale u tegay oo kala hadlay martiqaad ka yimi Wasiirka Arrimaha Dibadda Koonfur Afrika oo doorashada awgeed aan dib u dhigay, waxa uu ii sheegay in Edna Aadan iyo Cawaale ay i raacayaan, sidaas ayaan anna u sheegay Iqbaal oo qoladii na martiqaaday isna gaadhsiiyey.
Waxanu gaadhnay wadankaas maalintii 23-kii bishii May 2003, waxa qosal lahayd markii aannu ka degnay garoonka Johannesburg ayaa nala weydiiyay in aannu haysanno buuggii talaalka, dabadeed halkii ayaanu shaadhadhka xaydanay oo nala tallaalay, waxa qolka hab-maamuska fadhiyey Wasiirkii Arrimaha Dibadda ee Ethiopia, kooxdayada aniga ayaa ka garanayey markii

aan u tegay oo salaamay, ayaa qoladayadii kale loo sheegay ayey si Soomaali ah, haseyeeshee aan baratakool ahayn ayey u soo wada carareen oo Wasiirkii salaan ku boobeen.
Wasiirkii Koonfur Afrika oo na casuuntay ayaan la kulannay waa islaan qabiilka Suuluuga ah, waxay ku bilaabatay hadalkeedii in Wasiirkii Arrimaha ee Soomaaliya (CARTA) Yuusuf Dheeg ayaa naga codsaday in aannu idin wadahadalsiino ee maxaad ka qabtaan, waxa aannu u sheegnay in dawladdaas waqtigeedii dhammaaday oo hadda shir Nairobi ka socdo aanaan ka qaybgeli.
Waxaannu ka dhursugaynaa dawladda ka soo baxdaa sida ay kalsooni uga hesho Soomaaliya oo ay nabad iyo dimuqraadiyad ku soo dabaasho, markaas oo ayaanu la hadli doonaa haddii ay guulaysato.
Waxa aanu ugu sheekaynay doorashooyinka ka dhacay Somaliland iyo Dimuqraadiyadda iyo nidaamka xisbiyada badan ee ka bilaabantay, waxay tidhi; '*Haddii aad fiicnaataan yaad uga tegaysaan walaalahiin, yaa idinka xiga oo aad ku halaynaysaan, sidaad nabad u gaadheen ugu sameeya, anigu waxan ka soo jeedaa dadka Suuluuga oo mar doonayey inay dawlad Koonfur Afrika ka go'an inay yeeshaan.*'
Arrintaas waa ka hortagnay hadda dadka Suulugu waa 12 milyan oo ruux. Sidaas ayey ku soo gebgebaysay hadalkii, annaga oo joognay toddobo casho dalkaasi, kadibna waxaannu boqosho ku tagnay dalka Mosambiik oo bisha July 2003 qabanaysay shirkii Madaxweynayaasha Afrika, halkaas oo aannu kula kulanay Wasiirkii kowaad ama Ra'iisal-wasaarihii dalkaas.
Waxa kale oo aannu tusnay warbixin dhinaca sharciga caalamiga ah oo soo saaray garyaqaanka dawladda Koonfur Afrika oo ku saabsan qaddiyadda Somaliland, taas oo uu u ku soo gabagabeeyey, waxa loo ictiraafi waayey Somaliland iyada oo sharci ahaan mutaysatay ictiraaf. Warbixintaas waxa nuqul la keennay Madaxtooyada iyo Wasaaradda Arrimaha Dibedda, haseyeeshee meelna uma dhaafin, xataa jaraai'dka laguma qorin, lamana soo xigto xitaa marka madaxda dalku ka hadlayaan qaddiyadda Somaliland.
Ayaamihi Maxkamaduhu Koonfurta qabsadeen ayaa la isku yaacay oo dawladda Itoobiya iyo ururka Yurub dooneen inay ictiraafaan Somaliland, waxa la i soo warsaday nuqulkaas, ayaan-darro cid kale war kama hayso amma muhiimada uu leeyahay lama siiyo.
Maalin Britooriya aannu joognay ayaan Cawaale u sheegay in dawladda cusub ee la magcaabayo, labadayaduba ka maqan nahay, Wasiirka Arrimaha Dibedda ee cusub uu yahay Edna Adan-tan innala socota, waa uu la yaabay, waan ogaa markii aan Hargeysa ka soo tegayey iyo ka horeba iyo inuu Cawil noqonayo Wasiirka Maaliyadda iyo in Sacad Sheekh oo Khaarijiyada doonayey aannu helayn. Arrimahaas way wada dhaboobeen, markii aannu ku soo noqonay Hargeysa 2-dii bishii June ee 2003.
Waxa isbeddeley oo keliya iyadoo la igu magcaabay Wasaaradda Kalluumaysiga oo dawladdii la igu soo daray, magacaabistaydaas iskama iman ee rag badan oo Madaxweynuhu qadirinayey oo Isaaq ah ayaa arrintayda kala hadlay anoo maqan. Kalsoonidaas badan ee ay muujiyeen odayaashii Isaaq ee uu arkay, ayuu la yaabay oo uu iga soo daray dawladdii isaga oo aan ka raalli ahayn, haseyeeshee aniga ayaan u diyaar ahayn inaan xilkaas qabto, waxase igu qasbay raggii awal hawsha soo dhammeeyey.
Waxa kale oo loo sheegay Madaxweynaha inaan goluhu i ansixin doonin, markii ay 70 xubnood i ansixiyeen ayaa dharaartaa waxa u sheegay warbixinta ansixinta Wasiirrada Marxuumkii Cabdi Idiris. Sida marxuumku ii sheegay markuu u sheegay Madaxweynaha codka i ansixiyey ayuu Madaxweyne Rayaale ku yidhi Cabdi Idiris, '*Maxay noo waalayeen ee ay u lahaayeen ma helayo ansixinta.*'
Maalin dambe ayaan doonay inaan Madaxwynaha la kulmo, markii aan Xoghaynta u tegay waxan ogaaday inay kula jiraan laba Wasiir oo Dhulbahante ihi oo kala ahaa; Fu'aad Aadan Cadde iyo Yaasiin Xaaji Maxamuud, dabadeed intaan dhaafay Xoghayntii oo aan albaabkii iska furay ayaan kaftan ahaan u idhi, '***Wasiiradda Hartiga ayaan boobayaa***.'

Madaxweyne Rayaale ayaa kaftankii ka jawaabay oo igu yidhi; '*Adigu ma Harti ayaad tahay?*' Jawaabtii waan kala xishooday, waanan is dhaafiyey oo waxaan u sheegay inaan laba casho gaadhayo Djibouti.
Waxa igu soo dhacday in hadalka uu ka keenay hibasho uu hibanayo Isaaqii badnaa ee arrinkayga kala hadlay iyo labada Wasiir oo u ololaynayey Marxuumkii Oday ee i beddeli doona, waxase ka maqnaa inaan mar hore qorshaystay inaanan ka qayb noqon dawladdiisa.
Waxan xasuustaa habeen xayn Wasiirro ah oo aan ka mid ahay uu Madaxweynahu fadhigga gurigiisa noogu yeedhay oo aan anigu aad u xiiseeyey shirkaas, waayo waxa ka soo qaybgalay Wasiirraddii cusbaa, waxayna arrintu ku saabsanayd warqad uu soo qoray xisbiga KULMIYE oo ka dambeysay markuu aqbalay xukunkii Maxkamadda Sare ka soo saartay natiijadii doorashada oo caddaysay inuu Daahir Rayaale ku guulaystay doorashadii madaxtooyada.
Warqaddaas waxa ku saxeexnaa Xoghayaha xisbiga KULMIYE oo waqtigaas ahaa Marxuun Daa'uud Maxamed Geelle, Xoghayihii Madaxweynaha Daahir Cali Xuseen ayaa warqadii akhriyey, waxay isugu jiraan soo jeedino macquul ah iyo kuwa aan suurtagal ahayn oo laga rabo inay fuliso xakuumaddu.
Wasiirradii cusbaa ayaa u holaday hadal, Wasiir aan u hanweynaa ayaa ugu horreeyey oo shicibku aad u jecel yahay, waxa uu yidhi; '*Madaxweyne haddii Axmed Siilaanyo oo kaaga heli lahaa 80 cod miyuu kula hadli lahaa, waxba ha ka soo qaadin soo jeedintooda*.'
Halkaas ayaa wasiirradii cusbaa iska dabagaleen cambaaraynta KULMIYE iyo guddomiyihiisa, waxa ka duwanaa Maxamed Xaashi oo soo jeedintii aan waxba ka odhan ee ku taliyey in shaqada la badino, '*Sidii aynu u shaqayno ayaynu kalsooni uga helaynaa shicibka, markaas ayaan soo jeediyey in arrinta qodob qodob looga talobixiyo oo sidaas loogu jawaabo kuwa macquulka ah lagu raaco, kuwa aan suurtagal ahayn sidaas iyo sababta loo sheego*.'
Madaxweyne Rayaale taladaydii ayuu qaatay, waxa uu arrintii u xilsaaray Madaxweyne-ku-xigeenka iyo Wasiirradii inay jawaab soo diyaariyaan, kama aan qaybgelin shirkaas dambe, haseyeeshee fikradaydii oo qoraal ah ayaan u dhiibay Xoghayaha Madaxweynaha.
Soo-jeedintii KULMIYE waxa ka mid ahayd in saddexda xisbi miisaaniyad la siiyo, taas oo aan tageeray, waxa igu maqaala ah in hadda xukuumaddu ay siiso waxoogaa dhaqaale ah xisbiyada.
Laba bilood ayaan ku sii jiray dawladdii aroortii dambe, waxa xafiiska igu soo booqday Dr. Maxamed Samatar oo ah khabiir xagga dhaqaalaha ah oo muddo badan ka soo shaqeeyey Bankiga Islaamka oo markuu Daktooraha ka samaynaayey Jaamacadda Sussex ee ku taalla dalka England, aniguna markaas magaaladaa wax ku baranayey toddobaatannaadkii.
Subaxdaas waxa noo soo galay Xoghayahii Madaxweynaha Daahir Cali Xuseen oo warqad buqshad ah gacanta ku sita oo ii dhiibay, ma aan furin anoo garanaya waxa ku yaalla ee sheekadii ayaan iska wadanay, markuu iga tegay Maxamed Samatar ayaan warqadii furay, intaan isugu yeedhay shaqaalihii oo aan u sheegay in xilkii laga cafiyey oo ay xil-wareejin sameeyaan.
Subaxdii dambe ayaan ku wareejiyey Wasiir-ku-xigeenkii sidii warqadda uu Madaxweynuhu igu fartay, warbaahintana afkayga ayaan ka xidhay, halkaas ayaan ku soo xidhay siyaasadda oo aan ku jiray muddo 13 sanno ah, iyada ayaa i soo doonatay ee marna maan doonan.
Waxase Siyaasi Talyaani ah oo caan ahaa Faanfaani uu yidhi mar la waydiiyey in siyaasigu siyaasadda ka baxo, waxa uu ku jawaabay; '*Marka aad aragto siyaasiga oo naxash saaran ayuun baa la odhan karaa waxa uu dhab ahaan ka baxay siyaasaddii*.'
Waxa dhacday in Islaan Talyaani ah oo la odhan jiray Aneeliya oo hawlo samafal ah oo isugu jiray caafimaad iyo waxbarasho oo dadka tabaalaysan lagu gargaarayo ka waday magaalada Boorama, isla markaana u adeegaysa dadka baahan, ayaa lagu dhex toogtay magaaladaas, halkaas oo islaantaas ku dhimatay.
Bil kadib dilkii Aneeliya waxa lagu dilay lammaane macallimiin ah oo hayey Dugsiga Sare ee Sheekh oo Ingiriis ah, iyagoo goor habeen ah gurigooda dhex fadhiya, ayaa daaqadda laga soo

toogtay oo ay halkaas ku naf-waayeen. Labadaas dhacdo ayaa dhacday dhawrkii bilood ee aan xukuumadda ka sii maqnaa.
Aniga waxa aad ii dhibay dilkii ka dhacay Dugsiga Sheekh, waxaaan dib u xusuustaa markii aan yaraa ee aan ku biiray dugsigaas oo aad u magac weynaa, waxay ku beegnayd sannadkii 1964-kii.
Afartii sanno oo aan ku jiray dugsigaas waxaan xusuutaa inay ahaayeen waxa wax ka beddelay noloshayda dambe, aqoonta iyo ixtiraamka korniinka dhinaca maskaxda iyo jidhkaba ee ardaydu ka heleen dugsigaas. Waxaan odhan karaa waxa ka mid ahaa; ciyaaraha kubadda, xeegada iyo kubadda laliska oo heer sare laga gaadhay, maktabad buuxda ayaa ka mid ahaa fursadaha yiilay, meeshaas oo 24-ka saacadood furan ardaydii ka baxday oo dhammantood noqday Dhakhaatiir, Injineerro, Saynisyahanno, Dhaqaaloyahanno, qaarkoodna siyaasiyiin iyo madax qaran oo caan noqday, abwaano magac ku yeeshay bulshada Soomaaliyeed.
Dugsiga Sheekh waxaan soo booqday 1998-kii, markaas oo la fadhataystay oo ah kharaabad aniga oo aan is ogayn ayaa ilmo iga soo daadatay oo aan u adkaysan waayey muqaalka ii muuqda iyo xusuustii igu soo dhacaysay.
Nasiib-wanaag, aniga oo ah Wasiirka Qorshaynta xukuumaddii Cigaal (1997 – 1999) ayaa waxa xafiiska igu soo booqday Marxuumkii Ashcari oo u wakiil ah SOS oo wada mashruuc lagu hagaajinayo Dugsigii Sare ee Sheekh, waxa uu igu yidhi; '*Madaxweyne Cigaal ayaanu u tagnay oo nagu yidhi u taga Wasiirka Gees, haddii uu idinka oggolaado waa aan oggolaanayaa.'* Markaas waxa mashruucu ahaa in dugsi carruurta lagu daryeelo loo rogo dugsiga waxa aan u sheegay inaan idiin oggolaanayo mashruuca, haddii aad dugsigii sidiisii ku soo celinaysid oo uu ahaanayo dugsi sare, sidaas ayaa heshiiskii ku dhammaaday uu dib-u-dhis la yaab leh oo ka qurux badan tii hore lagu sameeyey. Mar labaad ayuu iridihiisa u furay arday cusub oo waxbarasho u haraadan.
Fajac iyo amakaag ayey igu dhaliyeen labadan dil, yaa arrintan oo kale fali kara, waxa isla arrintaas i weydiiyey nin safaaradda Ingiriiska ee Ethiopia xoghayaha labaad ka ahaa oo la odhan jiray Richard Owen.
Ninkaas oo Somaliland marar badan yimi oo aannu shaqadda isku baranay, waxa aan u sheegay inaan u malaynayo inay yihiin Islaamka ismiidaaminta ah ayaa fuliyay dilalkaas. Soomaali waxa mar kasta burburka maamulka dhexe sabab u ah laba arrin oo kala ah qabiil iyo diin.
Hadda waxa laga soo kabanayey dagaalladii qabiilka, waxa muuqday ifafaalihii dagaal diimeedka ee Islaamiyiinta ismiidaaminta ah sidii dagaalladii Daraawiishta oo isugu jiray dagaallo qabiil iyo kuwa Islaamka ismiidaaminta ah, boqol sanno ka hor.
Waxa aan gaadhay dalka Maraykanka oo ahayd markii iigu horraysay ee aan tago anoo sii maray Djibouti iyo London, tigidhka iyo jicsinka waxa iga bixiyey niman aannu macaruuf ahayn oo anigu xoolo aan haystay muddadii lixda sanno ahayd ee Wasiirka ahaa oo aan ka tabcaday may jirin, aqal reerku lahaa ayaan intaas ku jiray oo aan degenaa, waxa iga soo hadhay yaab iyo amakaag, inkasta oo dalal badan oo Yurub iyo Eeshiyaba leh aan hore u tegay ma filayn isbeddelka intan le'eg, waa qaarad dhan oo waddan qudha ah waa jannadii adduunka dad ayaa Maraykan wax ka sheega.
Nin aannu aqoonin ahayn ayaan idhi maxaad waddankii ugu soo noqon wayday, waxa uu igu jawaabay; '*Waar GDP amma wax-soo-saarka Soomaalida Gobolkan Minnesota joogta ayaa ka badan waxa Soomalida oo dhammi soo saarto amma GDP-eeda ee maxaan ka doonaa.*' Waa dhab waa ka raysteen dadkii qaxootiga ahaa Soomaaliya, waxayna gaadheen nolol la yaab leh, waxay ahayd intii aan xoogga lahaa inaan imaado, halka aan ratiga caanaha uga lisayey oo aan suurtagal ahayn in maamul dhexe loo sameeyo Soomaali amma ha kala go'do amma ha is-huwanaato'e.
Inta dhaqanka Soomaalidu ku dhisan yahay qabiil iyo diin aanay garanayn, oo wadaad-xume

dhex joogo oo diinta oo ku qoran af aannu garanayn si kale u fasiraya; wataa la gashay dirayskii Afqaaniga iyo isqarxintii Sumraawiga, iyana waa yaab.

Inkasta oo Soomaalida Maraykan degtay ka raysatay darxumadii iyo rafaadkii haystay, haddana waxa aan la yaabay inay weli horjoogaan oday-beeleedkii iyo wadaad xumuhii oo aanay dhinacaas waxba iska doorin, taas oo dhibaato ku noqotay sidii ay bulsho ahaan wax u wada qabsan lahaayeen amma ula dhaqmi lahaayeen dadka waddankan ay ku soo biireen ee kafaala qaaday.

Waxa ii suurta gashay inaan Aabbahay iyo Hooyaday iyo walaalahay iyo caruurtooda oo aanan arag tobaneeyo sanno aan soo arko, waxase iigu xiisa badnayd nin aannu isku fasal ahayn ilaa dugsiga sare oo Maraykan goor hore degay, ayaan la kulmay isaga oo Doktoor weyn ah (PhD) oo ku qaatay cilmiga kimikada, haatanna agaasime ka ah Shaybaar Dawladda Dhexe ee Maraykanku leedahay oo ku yaalla Gobalka Maryland, waxa uu leeyahay alaabooyin cusub oo uu ikhtiraacay.

Waxan xusuustaa isaga oo dhawr jeer igu qalqaaliyey inaan Maraykan imaaddo, mar aan Ingiriiska wax ku baranayey, mase aan yeelin. Waxa markaas igu soo dhacday bal inaan internet-ka ka raadiyo inamo Ingiriis ah oo aannu isla koorso wada qaadanay shahaadada Majasteerka cilmiga Fisikada, gaar ahaan qaybta (**Semiconductors),** waxan helay oo ii soo jawaabay Dr. Harry Whitlow oo wax ka dhiga Laba Jaamacadood oo ku kala yaalla Sweden iyo Finland, waxba iskuma ciil kaambiyin ee markaan joogay afar bilood dalka Maraykan ayaan gaadhay inaan qodaxley, boodh badan, bilaad wax-i-sii inaan ku soo laabto Geeska Afrika, halkaas oo dunida ugu saboolsan uguna colaad iyo qaxooti badan, oo aan goostay inaan ku idlaysto inta baytariga nolosha iiga hadhay. Waxa igu soo dhacday tuduc gabay ah;

Mugdi baan ka gacan haadiyaa Maxamed Kaydaw eh
Maangad abaar ah iyo diri baan maax ka deyayaa eh
Mawjada badeed iyo webaan moos is leeyahay eh
Dad masaamiiri dhegaha ka jirtaan maqal ka tuugaa eh
Soomaali midab doorsantaan meeday leeyahay eh
Mindidii adoogay dishaa madaxa ii taal eh
Micno ma leh adoonyadu haddaanad magac ka rabayn eh
Ma aan mahadin maalintaan dhashee ay ii mashxaradeen eh

Alla ha ku naxariisto Maxamuud Ismaaciil "Qaasim" waxa badan ayuu ku daakiray xaqa oo naga dahsoonaaye.

Sannadkii 2004-tii ayaan ku biiray duni aniga ii cusub oo hore dusha aan ka arki jiray oo ah Dunida NGO-yada, hay'adaha jimciyada qaroomaha (UN-ka) amma sida lagu naanayso ***Amiirada Saboolnimada*.**

La Soco Qaybta 3aad ee
Xasuus Qorka Maxamed Siciid Gees

NB: Qaybta 3aad marka aannu idiin soo gudbino, wixii intaa ka dambeeya waxa isaga oo dhammaystiran la isugu geyn doonaa buug uu heli doono qof kasta oo doonaya inuu wax ka ogaado mar xaladaha kala duwan ee Somaliland iyo xogaha qarsoon ee uu u soo joogay Maxamed Siciid Gees

Wixii talo ah waxaan noogu soo hagaajisaan email-lada; dalmar571@hotmail.com amma dalmar571@yahoo.com